TUSMO

Hordhac Socdaalka Nolosha..……...3
Safarkuna Dheeraa Wadaduna Fogaa…….11
Qaneecada……...……21
Asaaska Guusha……..40
Halganka Nolosha……...63
Sidee Baan Umaarayn Karnaa Geeddi Socodka Nolosha……..69
Caqabadaha Guusha Kaa Hor Istaaga……..…77
Maaraynta Nolosha Iyo Hogaaminta Haboon…….94
Hal Abuurka Ma Loo Dhashaa…….118
Gabay Ka Hadlaaya Guusha…….123
Gunaanad Socdaalka Nolosha……...124
Tixraaca……....127

Mahadnaq

Waxaan u mahadnaqayaa Allihii Subxaanna watacaalaa ii suuragashay in aan ku guulaysto buuggan, la'aantiisna aanan awoodeen in aan bilaabo.

Waxaana sidoo kalena umahadnaqayaa qofkasta oo talo iyo tusaaleba igasiiyay qoridda buugan.
Waxaa kaloo umahadnaqayaa cidkasta oo ka qayb qaadata faafintiisa, fikirkiisa, daabacaadiisa, tifatirkiisa iyo qofkasta oo akhriya.

Hibayn

Waxaan buuggan u hibeeyay hooyaday Alle ha unaxariistee janadii fardawsana Alle haka waraabshee Cadar Nuur Cali Qonof. Waxaana qofkasta oo akhriya buuggan ka codsanayaa in uu igu soo duceeyo hooyaday.

Arar

Qofkasta oo bini-aadam ah waa khaldama. Waxaana ahay ruux bini-aadam ah haddii aad khaladaad ku aragtaan buuggan, waxaan ka raali galin arintaas, sidaa darteed qofkii khaladaad ku arka ha ila sooxiriiro.
Buuggan oo aan bilaabay 23/08/2016, waxaan ku qoray muddo afar asbuuc ah, waxaana lagayaabaa in markaan wax qoraayay sameeyay khaladaad iwm. Taasna raali gelin baan ka baxshay.

HORDHAC
SOCDAALKA NOLOSHA

Waayaha adduunka waxaad kala kulmaysaa howlo iyo dhib. Qofna si fudud uguma gudbi karo adduunyo isagoo raadinaya nolol fiican. Ruux kasta oo jecel in uu ku noolaado nolol wacan waa in uu u safraa nolosha safar aad u dheer sida cilmiga loogu safro.

Socdaalku waa in aad ka tagtaa meel oo aad qabata meel adoo raadinaya raali ahaanshaha nolosha. Noloshuna waa mid is bedesha mar walba waxaad la kulmaysaa mar xalad adag oo waxaad nacaysaa joogitaanka adduunka.

Soomaaliduna waxay dhahdaa in adduunka lajooga waxaa diiday shidaad "dhib" taasna waxa ay keentay in malaayiin ummada oo dunida ku nool ay waayaan naftooda iyagoo raadinaya nolol waarta. Waxay usocdaaleen wadan iyagoo isaga gud baya carro, laba wadan, qaarad. Waxay baadi goob ugalaan sidii ay sacaado ugu noolaan lahaayeen. Qof walba waa sida uu isagu ugu sadcaalo nolosha.

Ruux ayaa usafra in uu helo adduunyo isagoo umaraya waddo aad u dheer oo dhib badan. Waxa uu la kulmaa dhibaato, waa lagu halaagaa, waa kufaa waa kacaa, waa dhididaa, waa daalaa, waa quustaa mar mar.

Waxa uu isku dayaa in uu usabro nolosha balse waxa uu arkaa in aysan raali ka ahayn naftiisa xaalka uu ku sugan yahay. Waxa uu gudo galaa in uu isku diyaarsho socdaal. Waxa uu u

sootabaabushaystaa in uu tago isagoo diyaarsanaya sahay raadinaya nolol waarta.

Soomaaliduna waxay dhahdaa " Naftu orod bay kugu aamintaa", waxay u ordayaan oo adduunyo waqti ugu luminayaan in ay helaan waddo ay uga gudbaan marxaladda ay hadda joogaan si ay u hantaan darajo ka saraysa tan ay ku sugan yihiin hadda.

Damaca aadanaha waa mid aad u sareeya, waa mid naaqusa, siyaada, dhex dhexaad noqda. Waa mid umaddu ay ku halaagsamaan waayo bini aadanka ayaa ah mid naf iyo maalba uhura tabcashada adduunyo iyo in ay kasbadaan maal fara badan. Tani waxay kuu horseedaysaa in aad fahanto meesha aad usocoto iyo meesha aad ka socoto.

Xagee joogtaa maanta? Xageese utabaabushaysan? Xageese qaban oo u socotaa? Maxaase doonin ? Maxaase rajayn? Maxaase kaa maqan oo dhibkaa ugu marin? Maxaase aad isleedahay noloshaada way ka beddalin?.

Waa su'aalo ubaahan in aad lafa gurtaa kana jawaabtaa si aad u hesho waddo, una fahanto waxa kaa horeeya. Tusaale maanta waxaad joogtaa meel hoose oo kuma qanacsanid nolosha aad ku nooshahay oo waxaa lagayaabaa in aadan ba helin quutal duruurigaaga. Waxaase lagayaabaa in aadan saddexda xili aadan ba helin wax aad quudato oo aad ku ilaaliso nafta si ay usii noolaato.

Waxaan joogaa waddo raf ah gaariga xamuulka ah uusan marikarin dhibna ku tahay in uu si xarago leh ugu socdo wixii saarana ay dhib iyo rafaad la kulmaan. Taas waxa ay keentay in aan ka guuro maanta oo uguuro hillin laami ah si aan ugu socdaalo marin raaxa ah oo aanan dareemin safarkayga.

Waxaan utabaabushaysan in aan usocdaalo meel aan ka heli karo nolol si aan adduunyadayda iyo aakhiradayda ugu shaqaysto oo aan uhanto nolol waarta, naftaydana raali ka noqota dareenkayga iyo shacbigayga.

Waxaan qabanayaa in aan aado ceel ama waadi halkaas oo aan ka filaayo in aan ka helidono wax kaafiya noloshayda si aan u hanto ruuxdayda. Waana tii la yiri **" Calaf waa laba cagoood".**

Waxaan doonayaa in aan noqdo ruux isku filan oo ka dhamaystiran dhan walba xag maal iyo xag cibaado si aan unoqdo qof leh magac iyo maamuus. Waa tii la yiri **" Ama meesha ka maqnow ama ka muuqo"** oo bulshada ayaan doonayaa in aan ka muuqdo haykal iyo haybadna ku yeesho.

Waxaan rajaynayaa in aan ahaado ruux leh mow qif adag, waxna ka badala heerka uu joogo. Waxaan rajaynayaa in aan ahaado ruux kamiro dhalinkara hadafkiisa iyo yoolkiisa. Waayo ruuxna kuma dhalan guul ilaa uu isagu isgaarsiiyo ama u safro oo naf iyo maalba u hura si uu bulshada iyo naftiisa wax ugu qabto isna ugaaro yoolkiisa ah in noloshiisa wax ka badalo kana guuro xero ama jabad uuna dego xero ka wanaagsan tii hore.

Tusaale reer miyigu marka ay degan yihiin xero mudo sanooyin ah waxa ku dilaaca qaniin. Waxayse sameeyaan jabadka waa laga guuraa oo waxaa loo guuraa jabad kale ama xero si looga ilaasho xoolaha qaniinka dilaacay. Dadka qaar waxay gubaan xerada waxayna laayaan qaniinka iyagoo adeegsanaya dab holcaya si uusan xooluhu umuqloobin.

Balse kama aysan fakarin noolaha ay gubayaan waxayse ka fakarayaan xoolahooda in ay ilaashadaan intaasna ay umaraan bad qabka nimcada Alle siiyay.

Waxaan dareemayaa in ay noloshayda wax ka dhiman yihiin, waxna ay tabayso ruuxdu. Maxaa yeelay ma helo quutal daruurigayga saddexda waqti. Waana igu adagtahay in aan u dulqaato noloshaan waayo naftaydu raali kama ahan in ay usabirto dhibkaan.

Aadanaha waxaa lagu yaqaan damac aad ubadan waxa uu jecel yahay in uu ahaado kan markasta guulaysta oo waxa uu neceb yahay in uu fashilmo noqdana mid nolosha ka dhacsan. Inta badan malaayiin umad ah ayaa isku dayda in ay ku noolaadaan nolol sare waxay umaraan dhib iyo shidaal waxayna ugu dambayn hantaan waxay raadinayeen.

Qof walba waxa uu doono waa helaa waana waayaa laakiin inta badan haddaad tahay qof daacad ah oo ka go'antahay in uu helo waxa uu doonayo ayna tahay wax Alle raali ka yahay hubaashi waad helin.

Alle subxaana watacaala waxa uu ku yiri qur'aankiisa kariimka ah (Haddii aad goosato arrin Ilaahay talada saaro, Ilaahay wuu jecelyahay kuwa talada saartee). suurada Al-cimraan aayada 159.

Waxaan ka fahmaynaa aayadaan waxkastoo lagu dhaqaaqayo in ay Alle dartii kaatahay oo aysan ka ahayn riyo keliya. Inta badan dadka guul daraystaa waxa ay ilaawaan qadarta asaaska nolosha oo ah Alle ka cabsiga iyo talasaarashada Ilaahay. Haddaaad tahay ruux jecel samaha ku dadaal in aad samayso wax wanaagsan oo lagaaga daydo bulshadana anfaca adna ku anfaca.

Socdaalka iyo safarka dheer aad ugalayso noloshaada iyo in aad wax ka beddaesho heerka aad joogto maanta waxaad u baahan tahay in aad hesho wasiil "waddo" aad u marto safarkaaga dheer iyo meesha aad usocoto si aadan ulumin oo aadan uga anban dariiqa guusha.

Waa in aad dhexda adkaysataa ileen safar baad ubixin, calfahaagana "kabahaaga" adkaysataa si aysan kaaga harrin ama kaaga go’in. Waa in aad u diyaar garowdaa hillin aadan aqoon meesha loomaro oo aadan ogayn waxa aad la kulmi doonto.

Soomaalidu waxay dhahdaa "Sabraa sadkiis hela" oo ay ula jeedo qofkii sabra oo dhibkasta u dulqaata ayaa guusha hanta. Allena in badan qur'aankiisa ku sheegay in saburku yahay kan laga rabo qofkasta oo muslim ah oo ku qanacsan waxa uu socdaalka u yahay.

Alle subxaana watacaala waxa uu qur'aanka ku yiri "Ruuxa Ilaahay ka baqa ee sabra Ilaahay ma lumiyo ajirka dadka wanaaga sameeya".

Waxaan ka fahmaynaa aayadaan in saburku yahay kan kowaad ee laga rabo ruuxa islaamka ah. Allena wuxuu ubalan qaaday qofkii ka cabsada isaga oo sabra in uu san dayici doonin waxkasta oo uu sameeyo oo wanaag ah. Taasi waa fursa waxaa naloo ka baahan yahay in aan ka faa'idaysano jaaniska oo Alle inoo balan qaaday.

Inbadan waa aragnaa dad wax balan qaadaya oo leh waxaan samayn doonaa shaqo abuur ee halaga faa’idaysto. Laakiin waxa aan ku bixinaa naf iyo maal si aan u hanano shaqadaa nala ku yaboohay. Waxaa lagayabaa in aanan helin balan qaadkaa dhibna aan umarno balse aadan waqti ku lumin kan Alle kuu yaboohay.

Waxaa nala karabaa in aan oofino balamaha si aan uhanano socdaalkeena aan ugu jirno nolosha oo u doonayno in aan guul gaarno. Dadka inta badan ma oofiyaan balamaha waqtiga waxay ku dadaalaan in ay buriyaan wacadkii ama yaboohii ay galaan.

Tusaale madaxdu marka ay musharixiinta yihiin waxay shacabka u sheegaan in ay yihiin kuwo uqaban doona waxa ay jecel yihiin. In ay heli doonaan waxbarasho lacag la'aan ah, caafimaad lacag la'aan ah, adeeg hufan, biyo iyo cuno. Dhaqaalaha oo kor looqaadayo, waddooyinka oo la dhisaayo, kaabayaasha dhaqaalaha oo kor looqaadayo. Waxayna bulshada u sheegaan in la dhisi doono waddooyinka iyo dhammaan kaabayaasha dhaqaalaha.

Laakiin balamahaas oo dhan ma oofiyaan marka la doorto. Waayo kama go'nayn in ay fuliyaan oo Alle ka cabsigi baa meesha ka maqan. Ama waxayba iloobeen aayaddii Alle qur'aanka ku sheegay ee ahayd (Oofiya balanta, balanta waa lays waydiin doonaaye).

Mar kale waa tii Alle aayad kale ku yiri " Dadka Ilaahay rumeeyayoow oofiya balamaha".

Laakiin waxaan nahay bini-aadan oo ma oofino balamaha iyo kamana faa'daysano waqtiga qiimaha badan oo Alle nasiiyay. Waxaa nala karabaa in aan oofino waxkasta oo aan dadka ka balan qaadno oo aynaan noqon dadka wax sheega laakiin aan oofin.

Soomaalida waxay ku maahmaahdaa (Balan daro diin daray leedahay), taasna waxaan ka fahmaynaa in xataa dhaqan ahaan balan daradu tahay mid xun oo aan wanaagsanayn.

Bal eeg xadiiskaan uu soo wariyay saxaabigii waynaa ee ahaa C/laahi Bin Cumar waxa uu yiri waxaan maqlay Rasuulka oo leh "NNKH", Afar arrimood ruuxa laga helo wuxuu noqonayaa munaafiq khaalisa, ninka laga helo mid ka midana waxaa ku sugan calaamad ka mida calaamadaha munaafiqiinta:- Waa marka la aamino oo uu khiyaameeyo, marka uu sheekeynaayo oo uu been sheego, marka uu balan galo oo uu buriyo , marka uu doodayo oo been ku dhaarto".

Waxaan xadiiskaa ka faa'idaysanayna wax yaalo badan oo ay ka mid tahay ilaalinta balanta, in aan lays khiyaamin, been la sheegin, runtana lagu dhaqmo Allena laga cabsado si aan uga dheeraano calaamadaha munaafiqiinta.

SAFARKUNA DHEERAA WADADUNA FOGAA

Waayaha nolosha iyo socdaalka la safraa addoon garanayn halka aad usoco. Waa wado dheer oo ubaahan in aad taqaano meesha aad usocoto iyo halka aad ka timid. Wadada yar waxay kugu ridaa wadada weyn. Taas micnaheedu waa in aad taqaano wasiilakasta iyo dhamaadkeeda.

Noloshuna waa tabtaa, waxaana yaqaan nin tabcay iyo nin uhaajiray.

Waa adagtahay in aad si sahlan aad u hesho xaqiiqda dhabta ah iyo dhammaadka guusha. Waxaa muhiim ah in aad taqaano hadafkaaga waayo hadafka waa salaanka nolosha iyo meesha aad usocoto. Yoolkuna waa dhammaadka hadafka. Waxay kuu fududaynaysaa hadafku in aad meeshaa utabaabushaysatay aad gaarto welwel la'aan. Muhiimadda ayaa ah in aad taqaano barta iyo madasha aad usadcaalayso.

Abwaan soomaaliyeed oo la dhaho Axmed Ismaaciil Diiriye oo ku magac dheeraa "Qaasin" wuxuu yiri gabaygaan.

1. Geeddiga la raray meel fog baa, loo gol leeyahaye
2. Gaadiidka waxaa loo hormarin, kan ugadh qaad dheere
3. Gargaari mayso askari, giigsan baa wadaye
4. Gudoodiyo mir baa loo balami, guuro bahaleyne
5. Gurya same ilaa lagu furay, gibishu saaraane.

Abwaanku waxa uu hogo tusaaleeyay sharaxaadna naga siiyay anbabaxa nolosha iyo safarka dheer ee lagalaayo. Sida gabayga ku cad waxa uu inoo sheegay marka la sadcaalayo loo baahan yahay in aad ka xaysato gaadiid aad u dheereeya, islamarkaana aad ugaadho hadafkaaga iyo bartilmaameedkaaga.

Soomaalidu waxay ku maahmaahdaa **"Sadcaal sahaydiis looma tilmaamo"**. Taas oo ay ula jeedaan qof walba waa yaqaan meesha uu usocdo iyo sahayda uu jidka ku maraayo. Ma ahan sahayda cuno keliya iyo biyo aad qaadato balse waa in aad u sahay qaadataa nolosha asaaskeeda iyo tiirka kowaad ee jiritaanka aadanaha oo ah Alle ka cabsiga iyo cibaadada alle.

Alle subxaana watacaalaa wuxuu yiri: (Camal sameeya Ilaahay wuu arki camalkiina, rasuulkuna wuu arki camalkiisa, mu'miniintuna way arki camalkiina).

Alle casaa wajalaa wuxuu nala doonayaa inaan awoodaheena aan xuduudaha lahayn boodhka kajafno.

Alle wuxuu naga doonayaa in aan keligiis caabudno oo aan cid kale lala shirki yeelin. Waayo Alle oo lala shirki yeelaa waxaa ka dhasha danbiyada kuwa ugu waaweyn. Ma jiro danbi ka weyn Alle oo cid kale lala wadaajiyo.

Alle qur'aankiisa kariimka ah wuxuu ku yiri (Wax kale la idin ma amrine waxaa la idin amray inaad Ilaahay camalka u badhaxtiraan).

Waxaan ka faa'idaynaa in Alle keliya lacaabudo oo aan cid kale lala wadaajin cibaadadiisa.

Alle markale waxa uu qur'aanka ku yiri (Wax kale uma abuurin insi iyo jini ilaa ay Ilaahay caabudaan mooyaane).

Rasuulkeenii suubanaa waxa uu yiri (Camalka oo dhan waa niyada, ruux kastaana wuxuu niyooday buu leeyahay, ruuxa hijradiisu ay tahay Ilaahay iyo Rasuulkiisa daraadii, hijradiisu waa Ilaahay iyo Rasuulkiisa, laakiinse ninka hijradiisu ay tahay inuu adduunyo soo helo amase naag soo guursado wixii uu usoo hijrooday uun buu leeyahay).

Xadiiskaa waxaan ka faa'idaynaa in waxkasta oo aan qabanayno ay niyo naga tahay. Haddii aad rabto in aad u safarto adduunyo iyo in aad u anbabaxdo hanti uruursi iyo maal tabcasho waxaad u haajirtay ama usadcaashay adduunyo in aad hesho. Laakiin haddaad usafarto Alle dartii safarkaagu wuxuu noqon mid Alle dartii usafray waxkasta oo wanaag ahna waa loo safraa. Safarna waxaa u wanaagsan kan Alle dartii loogu anbabaxo, niyadna kaatahay in aad samaynayso wanaag.

Tusaale haddaad rabto in aad sooxajido oo aad gasho safar waxaad ubaahan tahay in aad ogaato in Alle darti aad ubaxday oo aad usocoto in aad sooraali galiso alle. Wixii danbi ahna aad iska soodaahirto. Haddii aad iska aaday iska sooxaji oo halagu dhaho xaaji waxaa u haajirtay in lagu ammaano oo lagu dhaho xaaji iyo in

aad magac yeelato. Taasi ma ahan camal wanaagsan asii aad usafartay adduunyo.

Ruux kasta waxa uu ubaxaa waa rabitaankiisa iyo meesha uu doorbido. Qofna laguma khasbi karo meel uusan rabin balse horaa loo yiri (Dani waa seeto) oo ruux walba ma katalaabsan karo danta. Waayo ma jirto meel madax ka saraysa oo laga talaabsado.

Dad horaa yiri " Dantaadana maqaar eyna waa loogu seexdaa", taas micnaheedu ma ahan in laga hadlaayo ey laakiiin markaad rabto in aad howl fuliso waa in ay kuu cadahay howshaa aysan cidkale kaa hor istaagayn.

Waqtigu waa cajiib, waxa keliya uu qofku haysto oo ugu qaalisan waa waqtiga iyadaana ah shayga keliya oo adi lagu waydiinaayo maalinta qiyaamaha. Waa in uu kuu cad yahay waqtiga iyo waxa aad qabanayso maalinkasta iyo saacad walbaana aad qorshayso maxaa qaban ? maxaase qabsoomaay?.

Qofka bini-aadamka ah waxa uu haystaa 24 saacadood. Saacadkastaana waxaa ku jira lixdan daqiiqo "60" daqiiqo. Daqiiqad kastaana waxaa ku jira lixdan "60" ilbiriqsi. Qiyaas waqti intee leeg baa haysataa maalintii? waxaad haysataa 1,440 daqiiqo habeen iyo maalin oo u dhiganta 24 saacadood. Waxaana ku jira 86,400 oo ilbiriqsi.

Sidee uga faa'idaysan kartaa waqtigaa qiimaha leh oo aad haysato? waxaa lagaaga baahan yahay in aad samaysato jadwal midkaas oo kugu hagaya dariiqa kasta oo aad marayso.

Tusaale, ka soo qaad in aad haysato 24 saacadood, lix ka mida waad hurudaa, lixka midana waxbaa barataa, lixka midana waa shaqaysaa, lixka midana Alle ayaa caabudaa. Kawaran sida aad udejisatay waqtiga? macquul ma tahay in aad waqtigaaga aad maarayso?

Dabcan haa waa ay tahay waayo ardayga waxbarashada ku jiraa waxa uu leeyahay waqti, jadwal udegsan oo uu ku maareeyo waqtiga. Waxa uu wataa goor sheegtiisa "saacadiisa", waxa u qorshaysan lix saac waxbuu akhriyaa, lix saacna waxa uu jiraa wax barasho, lixsaacna Alle ayuu caabudaa lix saacna waa hurdaa.

Ardaygaa waxa uu intaas oo dhan usamaynayaa waa in uu ka faa'idaysto waqtiga qaaliga ah ee Alle subxaana watacaalaa ugu deeqay oo uu siiyay. Sidoo kalena in uu gaaro yoolkiisa iyo in uu ka miro dhaliyo hadafka uu leeyahay si uu uhanto guusha isagaana iska ilaaliya in uu ku dhaco guul daro.

Hees baa ahayd waqtigu in uu qiimo leeyahay maxbuus ciilan baa og. Kawaran heestaan yar waxay xoojinaysaa in saacaddu ay tahay shay qaaliya oo aan la dhayal san karin. Hadda markaad u baxayso safar dheer oo aad ugalayso noloshaada waxaa lagaaga fadhiyaa in aad hanato guusha. Sidee ku hanan kartaa ? waxaad qorshaynaysaa waqtigaaga si aad maalinkasta waxa aad qabanayso uga miro dhaliso.

Eeg xadiiskaan laga soowariyay suubanaheena "NNKH", waxa uu yiri (Ruuxna maalinta qiyaamaha Ilaahay agtiisa kama dhaqaaqi karo ilaa la waydiiyo afar shay: Cimrigiisa wixii uu ku dhameeyay, Cilmigiisa wixii uu ku qabtay, Maalkiisa meesha uu ka keenay iyo meesha uu ku baxshay iyo Dhalinyarnimadiisa meesha uu ku dhameeyay).

Kawaran xadiiskaan waxaan ka faa'idaynaa in waqtigu yahay cajiib iyo soohdin aan la dhafi karin waayo waa furaha kowaad ee nolosha.

Kawaran haddii lagu dhaho waad cabtaa waayo waad haraadaa, waad cuntaa waayo waad gaajootaa, waad seexataa waayo waad lul mootaa, waxaad ubaahan tahay in aad hesho nolol sare sababtoo ah dabcigaaga ayaa ku siinaya in aad hanato guusha iyo hadafkaaga aad intaa u ordayso.

Maahmaah baa ahayd (Salaad walba waqtigeedaa la tukadaa), taasna waxa ay inoo kor dhinaysaa in aan hanano yoolkeena. Kaasna waxa aan ku gaari karnaa anagoo maarayna waqtiga samaysanana soohdin aan la dhaafi karin.

Waxaan sooqaadanaynaa xadiis micno weyn xanbaarsan bal ila dhuuxa xadiiskaan iyo waxa ku duugan.

Abuu Muxamed C/laahi bin Camar bin Caas “ Alle raali haka noqdee", waxaa laga wariyey in Rasuulku "Naxariis iyo nabad gelyo

kor kiisa ha ahaate" yiri (Axadkiin Alle ma rumayn ilaa hawshiisu raacsanaato wixii aan la imid). Waa xadiis wanaagsan oo saxiix ah.

Waxaa uu inoo faa'idaynayaa xadiiska waxkasta oo aynu ku dhaqaaqaynu oo howl ah in aan laga tagin Alle ka cabsiga iyo wixii uu ina amray oo aan la nimaano wixii uu ina ka reebayna aan ka tagno.

Maxaa inoo diiday in aan badino cibaadada Alle iyo in aan ka faa'idaysano waqtigeena qiimaha badan oo aan haysano.

Maah maahdaan bal ila eega (Qofka waxaa hor kaca hawo iyo hunguri, waxaana dhinacyo mara ama dhinac socda faa'iido iyo khasaare, waxaa daba gala gabow iyo geeri). Waxaan ka dhadhansan karnaa maah maahdaan ruuxkasta in uu jecel yahay in uu helo faa'ido uuna neceb yahay khasaaraha. Kawaran haddaad waqtigaaga khasaariso maxaa heshay oo aad faa'iday waa waxna.

Waxaa ku daba socdana saw gabow ma ahan oo lagu waydiin maayo waqtigaaga qaaliga ah meesha aad ku lumisay iyo waxa aad qabatay. Dhinaca kale saw geeri kama danbayso oo kugu imaan mayso adoo isku haysta in aadan dunidaanba wax yar joogin saw saacad qudha laguu imaan maayo. Haa waa la ii imaan waxaana lay geen qabri laba mitir ah oo ciriiri ah, mood iyo nool waxaan lahaana dunida ayaan uga caraabay saacad qudha.

Waxaan sooqaadanaya xadiis aad umicno weyn oo ka hadlaya rajada Alle. Bal ila eeg xadiiskaan oo dhuux kuna dhaqan waa wax adiga ku anfacaya anigana ina anfacaya ruuxkastaana anfacaya.

Anas " Alle raali haka noqdee" wuxuu yiri: Waxaan maqlay Rasuulka "NNKH" oo oranaya " Allaah wuxuu yiri " Bani-aadamow haddii aad i barisid oo kheyr iga rajaysid waan kuu dhaafayaa wixii danbi kaa dhacay anoo u kala aaba yeelin, Bani-aadamow haddii ay dunuubtaadu gaarto samada daruurteeda ka dibna aad iga dambi dhaaf dalbato waan kuu dambi dhaafayaa.

Bani-aadamow haddii aad ila timaado arlada muggeed oo dambi ah ka dibna aad ila kulanto adigoo aan ii shariik yeeleyn waxaan kuula imaanayaa arlada muggeed oo dambi dhaaf ah". Waxaa weriyay Tirmidi wuxuuna yiri waa xadiis wanaagsan oo saxiix ah.

Alle aynu ka cabsano meelkasta aynu joogno oo aan isaga keliya aan caabudno cidna aynaan la shariik yeelin. Alle casa wajalaa waa uu ina abuuray anagoo aan jirin nala aqoon, waxa uu ina keenay ifka anagoo aan waxba garanayn, waxa uu inoo qoray wixii aan cunilahayn oo dhan, haddana meesha waxaan ka maqnayn in aan la nimaano dadaal iyo alle ka cabsi si aan liibaanteena adduunyo iyo mida aakhiro ugu guulaysano.

Geeraarkaan waxaa tiriyey Cilmi Cabdi, wuxuuna Ilaahay kaga baryayaa inuu cadaabtiisa kaga badbaadiyo carcaraafna uusan joojin, wuxuu yiri:

Cilmi waa kan Ilaah cirka uu ku dhisay
Ciiddana uu ku goglay
Cadceedda korka joogtiyo
Dayaxa uu ku caddeeyey
Oo caradda noogu iftiinshay
Cilmi waa kan Ilaah uu caruurta haweenka
Calooshooda ku uumay
Intuu ceeshka ku siiyey
Caafimaad kaga keenay
Cilmi waa kan Ilaah badda uu ku ceshay
Ku cabiiidshay halkeeda
Cilmi waa kan Ilaah cudur uu qof u keeney
Cad baruur leh u diiday
Qofna caafiyad siiyey
Cayilshoo kor u naaxshay
Cilmi waa kan Ilaah , caleemaha iyo cawskiyo
Cagaar doogliyo geedo
Dhirta ciidda ka beerayoo
Nina coodka u siiyey
Nina caydha ka yeelay
Ku ciddhiidhyay adduunka
Qofna uu ku cadaabayoo
Ku ciqaabayo naarta
Qofna caano macaan iyo
Jannadii ku ciseeyey
Caqlina waa kan rasuulka
Caadilkeen ku abuuray

Caalamkoo dhan ka doortay
Casiisow Allahayow
Caadilkii na abuurow
Cilmi kaaga ahaaye
Car-caraaf hana joojin.

Geeraarkaan aadka uqiimaha badan waxaan ka faa'idaynaa in Alle uu waxbaxsho qofkii uu doonana uu siiyo kii uu doonana udiido. Waxaa kaloo ka faa'idaynaa In Alle yahay kan caafimaadka baxsha xanuunkana keena kii uu doonana siiya caafimaad, kii uu doonana ku imtixaama xanuun.

Alle waa kan baxsha maalka, qofkii uu doonana waa siiyaa kii uu doonana waa qadiyaa. Alle waa kan naxariista qofkii uu doonana wuu siiyaa kii uu doonana waa laga dheereeyaa. Alle waa kan leh cadaab iyo janno qofkii uu rabana waa cadaabaa kii uu doonana jannuu ku abaal mariyaa.

Alle waa kan xakuma koonka aynu ku noolnahay, isagaa sidii uu doono ka yeeli karaa. Alle waxa uu maamulaa dayaxa iyo qoraxda, habeenka iyo maalinta iyagoo aan isku khaldamayn.

Alle waa kan kalahaga dhammaan wixii dunida dusheeda yaal mood iyo noolba. Alle waa kan adiga oo aan jirin kaa dhigay ruux muqdar ah oo cago iyo caqli leh, garasho iyo garaadba ku siiyay.

QANEECADA.

Qaneecadu waa in aad ku qanacsan tahay waxkasta oo Alle ku siiyo. Tusaale ahaan, Alle waxa uu ku siiyay nimcooyin aad ubadan oo kala duwan sida islaamnimada, lixda lixaad oo lagu dhamaystiray, caafimaadka Alle kugu galadaystay, maalka Alle kugu deeqay, cimriga uu Alle ku siiyay waxaas oo dhan waa nimcooyinka aad haysato waa in aad ku qanacdaa.

Dad badan oo dunida ku nool ma fahansana nimcada ay haystaan kumana baraarugsana bal iskaba daaye waxay u hanqaltaagaan wax uu haysto qof kale waayo ma dareensana waxa ay haystaan. Maanta Alle waxa uu ku siiyay laba xubnood oo aad u muhiim ah waa labada indhood. Waxaad ku aragtaa waxkasta oo adduunka kor yaal, noole iyo ma nooole, waxa wanaagsan iyo waxa aan wanaagsanayn.

Waa labada xubnood oo aadan ka maarmin inta aad nooshahay laakiin ma dareensanid in aad haysato nimco aad u weyn oo aysan haysan dadka kale waayo haddaad waydo maanta hal il waxaad wayday xubin aad umuhiim ah. Haddaad waydana labadaba waxaad wayday laba xubnood oo aad u muhiim ah waxaadna dareemaysaa maalinta aad waydo indhaha halkaas ayaana ku egtahay awoodaadaa. Waxaadna ku tawaawicidoontaa Alla maan ka faa’idaysteena markaan haystay aragayga, waxaadna oran doontaa waagaan araga qabay waxaas iyo waxaas kama faa'idaysan iwm.

Labada dhegood waa nimco Alle ku siiyay asii aadan garanayn waxa aad haysato. Imisa ayaad aragtaa dad dhegala? Imisaa aragtaa dad indho la'? Imisaa aragtaa dad dhego qabi jiray oo haatan aan

waxba maqal. Dheguhu waa kuwa keliya oo kuu suuragasha in aad wax maqasho sida sharqan, cod, qaylo, nuuxnuuxda, sawaxan iwm.

Maqalku waa shay qaaliya waxaadna garan doontaa maalintaad waydo maqalka ayaa oran doontaa waxaan waayay xubin aad umuhiim ah balse maalintaa waxba kuma tarayso hadal. Waxaa hadda lagaaga baahan yahay in aad ku dadaasho in aad ku dhagaysato wax wanaagsan oo aadan ku dhagaysan wixii xun oo dhan. Tusaale, waxaad ku dhagaysataa qur'aanka kariimka ah, axaadiista, siirooyinka, wacdiga, iyo waxkastoo wanaagsan.

Haddaad ku dhagaysato heeso, fusqi, iwm waxaad la kulmi doontaa aakhiro in dhegtaada meesha daloosha lagaaga shubo naar sida lasoowareyay, waxaadna ka shalaayaysaa maalinta qiyaamaha.

Qofkasta maanta ayuu haystaa nimco aan la sookoobi karin haka faa'idaysto nimcada uu Alle siiyay. Maalin aadan awood lahayn ayaa oran doontaa berigii maxaan uga faa"idaysan waayay nimcadaa? Ma ogayn in lay waydiinaayo nimcadaa.

Alle wuxuu ku siiyay lugo aad meel walba ku tagto, haddaad ku aado meel xun waa lagu waydiin doonaa maalin aad Alle hortaagan tahay oo waad ka shalaayi doontaa waayo afkaaga waa la xirayaa waxa keliya oo hadlaya waa xubnaha uu Alle kugu deeqay laakiin aadan fahansanayn sababta laguu siiyay iyo waxa aad u adeegsatay.

Waxay oran doonaan wax aadan hadda dareensanayn in aad samaysay ama aadan ku baraarugsanayn. Haddaad ku aado meel khayr oo wanaagsan sida masjid, cilmi aad soobaranayso oo aan diintaada iyo adaabtaada aan wax udhimayn, diinta oo aad faafiso, jihaad, xaj oo Alle dartii u aado iyo in aad utoobad keento, gargaar aad ufidinayso dad tabaalaysan, ugurmasho aad ugur manaysid dad muslimiin ah oo meel ku gadoonsan, shaqo aad ku aado, goob wanaag lagu hayo oo aad booqato, raacitaan aad raacdo qof dhintay oo aad janaasada aad ka qayb gasho, booqasho aad u aado qof xanuunsan, qof qaraabadaada ah oo aad xiriirinayso, deriska oo aad booqato, IWM oo aad samayso waa wax wanaagsan oo kuu ah kayd waayo wax lagaa rabay ayaa la timid waana wanaag aad uga faa'idaysatay nimcadii Alle ku siiyay.

Nimcada Alle ku siiyay waxaa ka mida caqli aad kaga duwan tahay dhammaan noolayaasha kale, waayo Alle ayaa ku karaameeyay oo kuu gartay caqli aad ku garato waxa wanaagsan iyo waxa xun, si aad uga leexato dhababa aan wanaagsanayn uguna weecato dhababa toosan.

Alle sareeye waxa uu ku yiri qur'aankiisa isagoo ka hadlaya karaamada uu siiyay bini-aadamka (Waanu karaamaynay bini-aadamka). Waxaa Alle ku siiyay karaamo tii ugu wanaagsanayd uu Alle baxsho, waayo haddii uu Eebbe casaa wajalaa ku siiyay fadli dheeraad ah oo aad kaga duwan tahay noolaha kale saw ma ahan in aad karaamada uu Alle ku siiyay aad qirato oo aad ogaato uguna mahadceliso Rabigii ku siiyay nimcadaa.

Alle waxa uu usameeyay koonkaan oo dhan iyo wixii ku dulnool, waxa uu karaameeyay dadka, waxa uu kala soocay xayawaanka oo iyaga caqli lama siin ay wax ku kala gartaan waayo hadday lahaan lahaayeen ma ay inoo suuragasheen in aan saan doono ka yeelno balse nimcadaa Eebbe nasiiyay magarawsanin oo waxaan isku haysanaa dad aan jirin.

Ogsoonow in aad haysato nimcooyin aad usareeya oo aysan haysan dad badan oo kula mida.

Waxayna ku ducaystaan Allow nasii nimcadaa aad siiyay dadka kale sida lixda lixaad oo dhamaystiran, caafimaad wanaagsan, arag wacan, maqal fiican, lugo ay meel walba ku tagaan, maal farabadan, cilmi iyo cood, hibo Alle gaar kuu siiyay IWM.

Soomaalidu waxay ku maahmaahdaa (Xikmad la'aan caqligu waa xaalufaa), oo waxay inoo faa'idaynaysaa in haddii lawaayo xikmad uu xaalufaayo caqligu uusanna ushaqaynayn sidii larabay oo kale waayo mahaysatid caqli kugu filan. Dadku marka ay durayaan qof waxay dhahaan "Hebel caqligiisa futadaa laga gashay" ama waxay dhahaan "Hebel caqli dameeraad buu leeyahay" taas waxay kuu cadaynaysaa in uu faa'iido badan leeyahay caqligu uusan ahayn cayaar una baahan yahay in laga faa'idaysto.

Inkastoo dadka maanta dunida ku kornooli aysan ka faa'idaysan waqtiga ay haystaan iyo caqliga waayo ma jiro jaanis ay kaga faa'idaysan doonaan haddaysan hadda maanka ka shaqaysiin.

Qof walba waxaa lasiiyay caqli ku filan iyo waqti uu ka faa'idaysan karo nasiib daro dadyowga dunida ku nooli inyar baa ka adeegsatay wax ka yar 0.001 taas micnaheedu waa in ay san uga faa'idaysan siddii uu Alle ugu talagalay.

Alle mar uu ka hadlaayay caqliga waxa uu yiri (Xikmad qof la siiyay waxaa la siiyay kheyr aan xad lahayn). Waxaan ka faa'idaysanaynaa in xikmadu tahay shay qaaliya oo aan la dhayalsan karin una baahan fakar dheeraad ah iyo hogo tusaalayn saa'id ah.

Soomaalidu waxay dhahaan (Xubintii shaqaysataa wey xoogsataa tan xaragootana waa xoodantaa). Taas micnaheedu waa in aan ka shaqaysiino caqliga uu Alle nagu karaameeyay kana faa'idaysano waayo waa xubin qaali ah oo aan la dhayal san karin.

Qofkastaana waxa uu ubaahan yahay in uu weeleeyo maanka iyo fikirkiisa waayo haddaadan ka shaqaysiin maanka waxaad noqonaysaa sida xoolaha oo kale. maah-maah baa ahayd (Qofkii malab raba micida shinidu ma hurto) taas waxaa loola jeedaa in la dulqaato loona dhabar adaygo waxkasta oo laqabanaayo iyo in caqligu shaqeeyo lagana fakaro mustaqbalka si aad u hesho sacaado adduun iyo aakhiroba.

Alle subxaana watacaalaa waxa uu qur'aankiisa ku yiri " Ilaahay waa ina abuuray wuxuu idiin yeelay maqalka, araga iyo caqliga wax yar baad Ilaahay u shukridaan".

Markale ayaa Alle qur'aanka ku yiri " Miyaydaan arkayn sida naftiina u abuuray".

Mar kale waxa uu Alle qur'aankiisa ku yiri isagoo ka hadlaya caqliga " Haddii aad ahaan lahayd mid qalbi adag oo dabci xun dadku agtaada way ka yaaci lahaayeen".

Mar kale Alle isagoo ka hadlaya abuuritaanka uu idiin uumay waxa uu yiri (Ilaahay wuxuu idiin abuuray abuuritaan kiisa ugu fiican ugu quman).

Dhammaan aayaadkaas waxay ka hadlayaan waa abuuritaanka Alle abuuray addoomihiisa sida ugu quruxda badan oo u dhamaystiray dhammaan intii Alle ugu talagalay iyo sidii looga faa'idaysan lahaa iyo in Alle lagu shukriyo oo labaryo lana waydiisto waxkastoo wanaag ah iyo in Alle unaxariisto uguna deeqo janadiisa uduga badan oo aan dhammaanayn abid.

Abuu Hurayra (Alle raali haka noqdee) waxaa laga weriyey in Rasuulku (NNKH) uu yiri (Xubin kasta oo xubnaha dadka ka mid ah sadaqo ayaa laga rabaa maalin kasta oo ay qoraxdu soo baxdo, laba ruux oo aad dhexdooda caddaalad dhigtaa u samayso waa sadaqo, ruuxii aad u kaalmayso oo alaabtiisa kor ugu dhiibto asagoo gaadiid raacaya waa sadaqo, hadalka wanaagsan waa sadaqo, tilaabadii aad ugu socoto salaad waa sadaqo, wadada oo aad ka qaado wixii dhib ah waa sadaqo). Waxaa weriyey Bukhaari iyo Muslim.

Dhammaantood waxaan ka fahmaynaa in xubnaha Alle nasiiyay uu nagu yahay ammaano lana karabo in aan ilaalino dhowrno, xafidno, ka taxadarno ugana faa'idaysano dhanka wanaagsan oo Alle raalida ka yahay.

Waxaan haysanaa nimco aan la sookoobi karin laakiin aynaan dareensanayn nicmadaa aan haysano kuna damaashaadayno laakiin waxaad garan xiliggii aad waydo nimcadaas markaasna waxba kuu tarimayso shalayay iyo maxaan uga faa'idaysan waayay.

Imisaa ayaad aragtay dad badan oo maal qabeen ahaa oo haatan waxba haysan? imisa ayaad aragtay dad magac iyo maamuus lahaa oo aan maanta dibada laga sooxaraysanayn? Imisaa ayaad aragtay shiikh caalim ahaa oo isbedelay? Imisa ayaa aragtay ruux lahaa caqli iyo xikmad oo waalan oo farihiisa kala ogayn? Imisa ayaa aragtay dad badan ama qabaa'ilo boqortooyooyin ahaa oo maanta jirin? Imisaa aragtay dawlado awood lahaa oo haatan haysan wax awood ah ama burburay oo magacooda la xusin? Imisaa halyay aragtay oo aan la xusin maanta?.

Waxaas oo dhan waad arkaysaa maalin walba habeenkasta saacad walba laakiin kuma cibro qaadanayso waayo qalbigaaga ayaa in gagay oo lagu soo karimaayo ka faa'idayso maankaaga si wanaagsan.

Qamaan bulxan mar uu ka hadlaayay dadka islawaynidooda iyo in iyagu wax ismoodaan ayuu tiriyay gabaygaan uu ugu magac daray WALLEE INAN RAGOW wuxuna yiri:

1. Toolmoone hadal waa inuu tol u dhexeeyaaye
2. Tuushkii xun iyo wiil yar baa wax isla tookhaaye
3. Taab baa la sii furi haddii kibir ku taabtaaye
4. Wallee inan ragoow talo adduun taada uun ma ahan

5. Haddaad keli inaad taajir tahay tuhuntay uur kaaga
6. Toodowga xoolaha rag baa tiro ku sii dheere
7. Walle inan ragoow talo adduun taada uun ma ahan

8. Tammaddaada adigoo tegoo fara ku taagaystay
9. Tunka yaa ku sooqaban haddaad tarad ku xaajooto
10. Mid uun baa tusmada kaa raroo lagugu taagaaye
11. Wallee inan ragoow talo adduun taada uun ma aha

12. Tufta iyo tahliishii wadaad amase towxiidka
13. Tawdeeriyo haddii awgayoow lagugu tiimeeyo
14. Mid uun baa tambiid soo dhigtoo tacajib yaabnaaye
15. Oo tuug ka dhiga kaan lahayn waa tixdii Nebiye
16. Wallee inan ragoow talo adduun taada uun ma aha

17. Tafaxaydka xaajada haddaad taqasho waayeelka
18. Mid uun baa Tallaahida marooy tiisa noqotaaye
19. Wallee inan ragoow talo adduun taada uun ma ahan

20. Wiil taaninnimo loo bidoo sida talmiigaas ah
21. Oo lagu tawicinoo legdini timaha boodhaynin
22. Mid uun baa tab kula soo baxoo laga tix qaataaye
23. Wallee inan ragoow talo adduun taada uun ma aha

24. Kobtii toban nin joogtaba haddaad turuqdo kii aad ah
25. Adna kii dambaad halis u tahay inuu ku toogtaaye
26. Wallee inan ragoow talo adduun taada uun ma aha.

Waxaan rabaa in aan sooqaato qodobo kooban si aad u fahanto qaneecada iyo waxa ay tahay.

1. **Caafimaadka:** Alle waxa uu ku siiyay caafimaad, waxaadna haysataa nimco aan la sookoobi karin waayo ruuxii la siiyo caafimaad maalinta qiyaamaha waa la waydiin doonaa waxa uu uga faa'idaystay caafimaadkiisa.

Inta aad haysato caafimaad ku dadaal in aad samaysato waxkastoo aad Alle ku raali galin kartid. Soomaalidu waxay dhahaan (Xanuun hortii cibaadayso), ujeedkuna waa in aad Alle ku xirnaato oo tixgaliso xaalka aad ku sugan tahay. Imisaa aragtay qof leh markaan caafimaadka haystay kama aan faa'idaysan sixadii uu Alle isiiyay.

Haddaba haddii aad dhahdo waxaan raadin arrin oo aad go'aansato in aad u baxdo oo uu ku haleelo imtixaan sida xanuun kaas oo kuu diida in aad aado howshaadii iyo xaajadaadi? Maxaa dareemaysaa?

Waxaad dareemin murugo waxaadna oranaysaa haddaan helilahaa caafimaad Eebbe ayaa u toobad keeni lahaa, Alle ayaa raali galin lahaa, markaasna waxaa xasuusan in caafimaadku yahay shay qaaliya oo Alle ugu manaystay addoomihiisa si ay uga faa'idaystaan

inta yar ee ay dunida joogaan. Balse nasiib daro marka uu helo caafimaad oo uu ka soobogsado xanuunkii waxaa uu ilaawaa waxkastoo xanuun ahaa oo soomaray. Sidoo kale wixii uu Alle amray oo dhan ilaa inyar oo Alle hanuunshay maahane.

In aad ku qanacdaa nolosha iyo caafimaadkaad haysato waa mid waajib ah, waxaana lagaa rabaa in aad la timaado waxkasta oo anfacaya naftaada adduun iyo aakhiro si aad uhesho qaneeco dhab ah. Hadda waxaa lagaa rabaa in aad ku dadaasho in aad ka sii faa'idaysato caafimaadkaaga ka hor inta aadan xanuunsan.

2. **Hantida:** Waxaad haysataa naf qani ah laakiin ma ogid waayo qaneecadu waxay kugu aamintaa waa inta aad haysato oo maal ah ama iimaan ah. Shayga ugu qaalisan qaneecadu waa iimaanka uu Alle ku siiyay haddaad garan waydo taas ma lihid wax qaneeco ah. Inkastoo soomaalidu ay sooqaataan maahmaahyo kahadlaaya hantida sida kuwaan oo kale

A). Hanti la hubo waa daar iyo dahab. Waxay ula jeedaan waxkastoo aad leedahay haddii aadan haysan daar aad seexato ama dahab aad madaxaaga dhigato hanti ma lihid laakiin dadkaas waxay ka fakareen hal dhinac oo ah adduunyo.

B). Hantidaada huggaaga kaa raacda. Waxay ka eegeen dhanka labiska iyo inta aad ka adeegsatay hantidaadaa oo iyagu kama aysan eegin xagga dhigaalka iyo dhadhamada danbe.

C). Hantidaada meesha ku haboon uhur. Dadkaan waxa ay udaliishadeen in waxkastoo aad bixinayso oo maal ah waa in aad ku bixisaa meel ku haboon. Sida sadaqo, tabarucaad oo aad ugu tabarucayso dad gaajaysan, qof baahan, qof daymaysan oo aad ka bixiso daynta adoo aan waji kala hayn, fiditaanka dacwada, difaaca islaamka, jihaad Alle dartiis ah, xajkoo aad ku aado, sako, iyo waxkastoo uu Eebbe raali ka yahay.

Sidaa haddaad samayso waxaad gudatay waajibaad waana ka soobaxday masuuliyadii. Balse maalin ayaa la waydiin doonaa qof walba meesha uu maalkiisa ka keenay iyo meesha uu ku baxshay, hadda waxaad haysataa jaanis ka faa'idayso kuna qanacsanow waxa aad haysato.

D). Hantidaadana waa loo sahan tagaa. Oo ay ula jeedaan wixii uu Alle ku siiyay waa in aad ku bixisaa meesha ku haboon adoo sidii sahankii indha indhaynaya xagee ku haboon iwm.

E). Hantidaada oori haboon baa lagaga dhergaa howraarna markhaanti baa lagaga dhergaa. Waa in aad maalkaaga aad ku bixiso meel sida haween oo kale waayo haweenku waxa ay ka qayb qaadataa in ay soo saaraan jiil u adeegi kara difaaca iyo ilaalinta diinta, waxayna soo saari karaan kuwo lidi ku ah jiritaanka islaamka iwm.

Balse ujeedka ugu weyn ayaa ah in haddii aad tahay maal qabeen kan dunida ugu taajirsan oo aadan haysan haweenay waxaad tahay faqiir waayo ma haysatid wax ka qaalisan hantidaada oo ah

haweenay aad qabto ku qancisa kuuna ilaalisa hantidaada adna ku dhowrta kana ilaalisa wixii adi kuu ah dhib iyo dib u dhac.

Waxaad arkaysaa dad leh hanti aad ubadan balse aan ku qanacsanayn waxa ay haystaan taasna waa imaankooda oo yaraada iyo in ay ilaawaan in maalku yahay fidno oo lays waydiin doono.

Waxay maanta dad badan oo ku nool dunida ay ka tagaan meesha ay joogaan iyagoo raadinaya maal fara badan waxay ugalaan safar dhib ah oo waxay khatar gashaan naftooda ilaa kuwo badan oo ka mid ah dadkaas ay naftooda waayaan oo qayb badan oo ka mida baddu cunto. Qayb kalena ay qaxooti iyo nolol ciriiriya galaan naftooda dhib u horseedaan.

Dadka noocaa ah waxay haysteen maal farabadan, waxay haysteen amni, caafimaad, iimaan, waxbarasho, shaqo iyo maal balse waxaa keliya oo ka maqnaa waa qaneeco oo kuma qanacsanayn hantida ay haystaan iyo maalka Alle ku galadaystay iyagoo ka door biday wax kale.

Eeg nin xikmad badan waa Xaamid Allafaaf waxa uu yiri, Afar shey waxaan ka raadiney Afar meelood qalad bayna ahayd. Waxaana ka helnay afar meel oo aanan ka filanayn.

A). Dheregta maal baan ka raadinay waxaana ka helnay qaneeco.

B). Raaxadana hanti baan ka raadinay waxaana ka helnay hanti yar

C). Macmacaanka nimco ayaa ka raadinay waxaana ka helnay jir caafimaad qaba.

D). Arsaaqdana dhul baan ka raadinay waxaana ka helnay samada.

Ruux kale oo xaakim ah ayaa yiri, Cibaado oo dhan waa afar

A). Oofinta ballamada

B). Dhowrista xuduudaha

C). Ka sabrida ehelkii kaa dhinta

D). Iyo ku raali noqoshada waxaad haysato.

Dhamaantood xikmadahaa waa wax dhab ah oo ku salaysan nolosha iyo socdaalka dhabta ah. Waxaana ka helaysaa waxkastoo wanaag ah oo diintana ay sheegtay xikmadna ah. Qof kasta waxaa la siiyay maal waana in uu ku qanacsanaado waxa uu haysto oo uusan dhayalsan kana dhigin hal bacaad lagu lisay.

Waan ognahay in aan shuufnay nafteena lana dagaalnay heerka aan joogno maanta balse soomaalidu waxay dhahdaa (Xoog xeelad baa ka adag), waxaa loo baahan yahay in aad adduunyadaadana u shaqaysato aakhiradaadana u sahay qaadato sidaa sila mida ayaa qof kasta laga rabaa.

Nin xikmad badan ayaa lagu yiri hebelow kawaran xaalkaaga, waxa uu yiri:

A). Ilaahay amarkii raac baan kula dhaqmaa

B). Naftaydana khilaaf baan kula dhaqmaa

C). Khalqigana waanaa kula dhaqmaa

D). Adduunyana daruuri baan kula dhaqmaa

Waxaan ka faa'idaynaa in waxkasta ay ku xirantahay Alle ka cabsiga oo aan marka hore garano lana nimaano wixii uu Alle nagu farad yeelay. Kadibna aan la dagaalno nafta oo aan kala dagaalno waxkastoo aad jeceshahay waayo naftu waxay rabtaa dhal dhalaalka adduunka, waxay rabtaa in ay raaxaysato, waxay rabtaa in ay ku noolaato nolol tan ugu fiican, waxay rabtaa in aysan cibaadaysan oo aroortii mayran oo qubaysan. In aysan akhrin qur'aanka kariimka ah.

Dhammaan haddaan isku soo xoorino naftu waxay jeceshahay waxkastoo cabaadta ku hareeraysan balse ay ka wahsato waxkastoo janno lagu galo.

Waxaan kaloo ka faa'idaynaa in khalqiga lagula dhaqmo wanaag oo laqadariyo ruuxkasta. Kii kuula yimaada wanaag aad ugu bedesho wanaag, kii kuula yimaadana xumaan aad adna ula timaado wanaag iyo cafis waayo Eebbe ayaa nagu booriyay in aan samaha ka shaqayno. Ruuxii cafiya dadka Alle ayaa isagana cafiya.

Qiso yar saxaabi ka mida saxaabada ayaa habeenkii marka uu seexdo cafin jiray dhammaan dadka oo dhan, qofkastoo xanta, qofkastoo xumaan ku sameeya kulli waa cafin jiray. Nebiga ayaa yiri hebel waa ehlu janno, sa waxaa daba galay saxaabada qayb ka mida si ay u ogaadaan camalka uu janada ku galay.

Saxaabi ayaa utagay oo ku yiri waxaan rabaa in aan kula joogo oo gurigii baa layga sooburiyay, markaas ayuu dhahay haye ila joog inta aad rabto oo dhan. Waa uu la seexan jiray ilaa dhowr habeen markaas ayuu dhahay saxaabigii wax baarayay hebelow ani layma sooburin balse waxaan Nebiga ka maqlay in uu yiri hebel waa ehlu janno anna waxaan is iri wixii uu jannada ku galay soo ogow waxaana ogaaday in aadan cibaado badnayn ee iiga sheekee waxa aad samayso oo aad jannada ku gashay.

Markaas ayuu dhahay ani ma camal badni balse habeenkii markaan seexdo ayaa cafiyaa dhammaan ummadda oo dhan qofkasta oo khalad iga gala ama yuusan iga galin intaas ayaan umalayn in aan Jannada ku mutaystay.

Haddaba waxaan ka fahmaynaa in dadka wanaag lagula dhaqmaa in ay ku sugan tahay ajar aan la sookoobi karin. Nebigu naxariis iyo nabad gelyo kor kiisa ha ahaato in uu yiri "Hadalka wanaagsani waa sadaqo".

Sidoo kalena waxaan ka faa’idaysanaynaa xikmadaa kooban in adduunyo lagu mashquulin oo haddii aad haysato daruurigaaga

yacni waxaad quudato in aad ku qanacsanaanto oo aad Alle ka barido in uu kuu barakeeyo inta aad haysato. Waxaa laga yaabaa in aad saddexda waqti wax cunto laakiin waxaa jira dad kula mida oo aan helin wax ay quutaan saddexda waqti ama hal xili ka helaan. Saw ma ahan in aad ka faa'idaysato inta aad haysato oo aad ku qanacsanaato.

C/laahi bin Mubaarak ayaa yiri, nin xakiim ahaa ayaa aruuriyay axaadiis fara badan, wuxuuna ka xushay 40.000 xadiiis, haddana waxa uu ka sii xushay 4.000 xadiis, haddana waxa uu ka sii xushay 400 oo xadiis, haddana waxa uu ka sii xushay 40 xadiis, haddana wuxuu ka sii xushay 4 kelmadood.

A). Waxkasta oo dhaca kal soonida kugu danbaysa naag ha siin
B). Waxkasta oo dhaca adduunyo haku sirmin
C). Calooshaada haku shubin wax aysan Karin
D). Ha ka uruursan cilmi wax aan ku anfacayn.

Waxaa ka fahmaynaa in aan adduunyo lays raacin oo ay tahay meel ayaamo qudha la joogaayo. Waana tii uu Nabigeenu yiri (adduunyadu waa qof geed harsaday galabtiina ka caraabay). Waxaa lagu matalay geed aad duhurkii seexatay ka dibna aad ka carowday galabtii.

Waxaan kaloo ka fahmaynaa in kalsoonideena ugu danbaysaa aanan gacanta ugalin dumarka, xikmada ka danbaysaa ay tahay iyagoo aan lahayn caqli ay ku xakameeyaa amaanada ama kalsoonida la siiyay.

Sidoo kalena in aan cuntada layska badin oo laga qaato inyar oo ku anfacda ama aad ku xoogaysato.

Sidoo kalena in markasta Eebbe laga baryo cilmi naafic ah oo adduun iyo aakhiroba ku anfacaya. Taasna waxaa daliil kugu filan ducada ah " Ilaahow waxaan ku waydiisanay cilmi na anfaca, quud xalaal ah iyo camal la aqbalo".

Ila fiiri ereyadaan:

A). Hooyada dawooyinka waa cunta yari

B). Hooyada adaabtu waa hadal yari

C). Hooyada cibaadaadku waa dunuub yari

D). Hooyada hididiilooyinku waa samir.

Waxaan ka faa'idaysanaynaa xikmadaa quruxda badan in hantida yari tahay qaneeco sidoo kalena ay tahay hantida badan imtixaan.

Waxaa kale oo ka fahmaynaa adaabtu in ay tahay hadal yarida oo aysan ahayn in aad wax walba ku hadasho. Soomaaliduna waa iyaga dhaha (Hadal badan nin yirina waxba ma wada oran, hadal yar nin yirina waxba kama wadatagin).

Midda ugu danbaysa xikmadaa waa hididiilokasta in ay tahay samir oo haddaan loo dulqaadan aan waxba la helayn. Waa tii la yiri

"Adduunyo usamir ama ka samir", waxkasta waxa ay ku xiran tahay hididiilahaaga iyo ka go'naanshahaaga.

Ibnu Cumar Alle raali haka noqdee wuxuu yiri; Waxaa garabkayga qabtay Rasuulka naxariis iyo nabad gelyo korkiisa ha ahaate wuxuuna yiri (Ku ahaaw adduunyada dhexdeeda musaafir ama sidii qof jid gudbaya oo kale). Markaas ka dib Ina Cumar Alle raali haka noqdee wuxuu dhihi jiray: Haddii aad galabaysato ha sugin Subax, haddii aad subaxaysatana ha sugin galab. Intaad caafimaad qabto cibaadayso jiradaada ka hor, inta aad nooshahayna cibaadayso dhimashadaada ka hor). (Bukhaari baa weriyey).

3). Iimaanka: Alle wuxuu noogu deeqay iimaan midkaas oo ah mid Alle bixiyo oo keliya. Ruuxii laga helana uu yahay mid liibaanay adduun iyo aakhiro. Waxayna ka mid tahay nimcooyinka Alle baxsho. Waana in aad Eebbe ku shukrido sidoo kalena aad ku qanacsanaato.

4). Waqtiga: Waxaad haysata waqti, waxkastana waxaa ugu qiimo badan waa waqtiga isaga ayaana meel walba lagu gaaraa isaga ayaana ah kan lagu xaqiijiyo liibaanta adduunka iyo kan aakhiro waa haddii looga faa'idaysto si sharciga waa faqsan.

5). Muslimnimada; Waa shey qaaliya waana midka keliya oo aad haysato haddaad tahay ruux muslim ah waayo ma jiro wax ka waanagsan oo la haysto. Waana nimco uu kuu dooray kaagana dooray in aad ku hodmatid Adduunyo dhaldhalaalkeeda sidoo kalena shahwaadkaaga oo aadan raacin wixii alle kaa xarimay.

Sidoo kalena Alle wuxuu kaa badbaad shay cadaab waayo waxa uu kaa dhigay muslim taasna ma fahansanid nimcadaa uu Eebbe nasiiyay.

ASAASKA GUUSHA.

Waxkasta oo lasameeyo waxay leeyihiin qodobo laraaco oo lataaban karo waayo waxaad aragtaa ashyaa badan oo fara ku samays ah oo la sooraacsho tusmooyin ku waas oo ka turjumaya qaabka loo adeegsanaayo.

Tusaale ahaan, waxaad soogadatay matoor waxa uuna leeyahay qaab loo isticmaalo matoorka, waxaana kuu fududaynaya waraaqda yar ee la sooraacsho taasoo ku dhan habkii aad u adeegsan lahayd.

Haddaba sidaa silamida ayaa socdaalka noloshu ay ubaahan tahay in aad fahanto waxyaalaha lagu gaaro sacaadada nolosha adoo ka duulaya Alle ka baqida iyo waxyaalaha lagaaga baahan yahay.

1. Taqwada Alle: Waxaa qofkasta oo Alle iyo Rasuulkiisa rumeeyay laga rabaa in uu la yimaado wixii lafaray oo dhan, kana cabsado Eebbihii abuuray oo koonkaan keenay. Waa in uu la yimaadaa taqwo dhab ah iyo Alle ka cabsi ku salaysan khushuuc iyo ilmayn Alle dartii uqabatay.

Alle kor ahaaye wuxuu yiri: (Kuwa xaqa rumeeyoow dhowra xilka iyo waajibka Alle uu idin saaray dhowrid dhan). Suuradda aali-Cimraan: Aayadda 102.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye: (Dhowra xilka iyo waajibka Alle uu idin saaray intii karaankiinna ah). Suuradda al-Taghaabun: Aayadda 16.

Waxaan ka fahmaynaa in aan la nimaano waxkasta oo Alle ina ku waajib yeelay maxaa yeelay waanala waydiin doonaa maalin maalmaha ka mida.

Haddaba waxaa nala karabaa in aan la nimaano taqwa iyo Alle ka cabsi si aan ugu guulaysano nolosheena adduun iyo aakhiraba.
Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye (Kuwa xaqa rumeeyow dhowra cahdiga Alle iyo xilka uu idiin saaray, wax sanna ku hadla). Suuradda al-Axsaab: Aayadda 70.

Waxaan ka fahmayna qowlka Alle in uu nagula dardaarmayo in aan ilaalino balamaha maxaa yeelay dadka islaamka ah waxay gaalka uga duwan yihiin waa ilaalinta balamaha inbadan Alle qur'aankiisa ayuu ku yiri war dhowra oo oofiya balamaha.

Alle waxa uu yiri (Oofiya balamada, balamaha waa lays waydiin doonaaye).

Markale waa tii uulahaa (Kuwa Alle rumeeyoow oofiya balamaha). Dhammaan aayaadkaas waxay inoo faa'idaynayaan in aan ilaalino cahdiga iyo balamaha aynu galno.

3. **Alle ka cabsiga:** Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye: (Qofkii Alle ka cabsada oo waajibkii iyo xilkii uu saaray guta, makhraj buu u yeelayaa, meel uusan filayna waa ka irsaaqayaa). Suuradda ad-Dalaaq.

Alle waxa uu inoo balan qaaday ruuxii ka cabsada isaga, gutana waajibaadkiisa Alle, rumeeyana rumayn dhab ah, waxaa loofurayaa wado uusan ka filanayn wax irsaaqad ah. Alle inbadan aayaadkiisa waxa uu inoo ku sheegay qofkii uu rabana in uu irsaaqo xisaab la'aan, qofkii tala saarsadana Allaah waa nabad geliyaa. Waxkasta oo kugu dhacayana waa qoran yihiin oo Allaah kuu qoray maalintii ruuxda lagu gashay.

Anas bin Maalik (Alle raali haka noqdee) wuxuu yiri: Waqtigii Nebiga (NNKH) waxaa jirey laba nin oo walaalo ah; midkood Nebigu (NNKH) u adeegi jiray, midna camalkiisuu raacan jiray. Maalin baa kan dambe Nebiga (NNKH) uga soo eed sheegtay walaalki una sheegay inuusan noloshiisa wax u kasban. Nabigu (NNKH) wuxuu ugu jawaabay: Waxaa laga yaabaa in laguga irsaaqo dartiis. (Tirmidi baa sanad saxiix ku weriyey).

Fiiro gaar ah: Tawakul waa eray Af Carabi ah, luqad ahaanna waxaa weeye inaad ku tiirsanaato cid uun. Diin ahaan waxaa loola jeedaa tawakulka inaad Ilaahay ku kalsoonaato, ku tiirsanaato, isku halleyso, imaankana ku qabto oo aad talo saaratid; Waase in la kala saaraa tawakulka iyo tawaakulka. Nimanka suufiyiinta waxay ka qaateen macno ah in meel layska fadhiyo, oo aan la xoogsan, waxsabab ahna aan lala iman. Taasoo runtii ceebku ah diinta, waxna u dhimeysa bilicda iyo wanaaggeeda.

Waxaa la doonayaa inaad Alle talo saarato adigoo wixii sabab ahaa oo aad kartey oo dhan la yimid, aad yiqiinsatidna marka qorshe iyo hab maamul wanaagsan aad arrintii ku sameyso inay isku dubba

dhaceyso oo ay guuleysaneyso hadday dani inoogu jidho Allena uu gacan nagu siinayo. Sidaa baana Tawakkulka dhabta ah.

Qofka islaamka ah waa in uu ahaadaa ruux markasta ujeeda Allaah kana cabsada, sidoo kalena guta waajibaadkiisa, Alle ma luminaayo ajarkiisa. Waxaan kaloo idinku baraarujinayaa, haddii aad rabtaan in aad ku noolaataan nolol sare waa in aad gudataan waajibaadka Alle. Waxaad ku guulaysanaysaan socdaalka nolosha waxaana hananaysaa guusha aad dalbayso.

3. Danbi dhaaf dalbasho: Qofka islaamka ah waa in uu ahaadaa ruux ujajaban cibaadada Alle, ogsoonaadana in gudashada waajibaadka Alle yahay mid faral ah. Haddii aad gasho denbi, waa in aad Eebbe u jeesataa, denbi dhaafna waydiisataa si aad uguulaysato. Alle wuxuu ka jecel yahay ma leh ruuxii intuu denbi gala haddana ka toobad keena oo aan ku noqon.

Alle inbadan waxa uu inoo sheegay in haddii aan la nimaadno denbiyo ka culus arla’da iyo cirka muggiisa oo danbi dhaaf dalbano in uu noola imaanayo cafis iyo denbi dhaaf ka badan dhulka iyo cirka muggiisa. Alle waa mid naxariista kan ugu naxariista badan.

Allena waxaan ka baryaynaa in uu dhaafo denbiyadeena. Alle wuxuu asturayaa ceebaheena oo dhan haddaan la nimaadno toobad sax ah, Allena waa deeq badane.

Alle wuxuu ku yiri qur’aanka: (Haddii aad Alle ka cabsataan oo xilka iyo waajibka uu idin saaray gudataan wuxuu idin siinayaa

iftiin aad ku kala saartaan xaqa iyo baadilka, wuxuuna asturayaa xumaanihiinna, wuuna idiin dembi dhaafayaa. Allaah dambi dhaafe deeq badane ahe). Suuradda al-Anfaal:

Abuu Hurayrah (Alle haka raali noqdee) wuxuu yiri: Nebiga (NNKH) waxaa la weydiiyey: Yaa ugu sharaf iyo xurmad badan dadka dhexdiisa oo ugu gobsan? Wuxuu yiri: Kan ugu Alle cabsida badan.

Asxaabtii Rasuulka Waxay yiraahdeen: (Midaa kuma aanu weydiin), Wuxuu yiri: Marka waa Yuusuf oo Nebi ahaa oo ina Nebi ahaa (Nebi Yacquub) oo ina Nebi ka sii ahaa (Nebi Isxaaq), oo ina Nabi ka sii ahaa (Nebi Ibraahiim), Alle saaxibki. Waxay yiraahdeen: Sidaasna kuma aannu weydiin. Nebigu (NNKH) wuxuu yiri: Haddaas ma lafaha Carab-baad i weydiiseen. Marka ogaada kuwaa lahaa sharafta iyo xurmadda Islaamka ka hor, baa sharaf iyo xurmad badan markii ay Islaamaanna, waase markii ay diinta dhuuxaan, oo dhaqan geliyaan.

4. **In laga digtoonaado dhalanteedka adduunyada;** Dadka badankooda waxay ku hodmaan waa dhal dhalaalka adduunyada, waxay ilaaween in ay ka tagayaan. Fidnada ugu daran ee soo wajahdaa bini-aadamka waa aaminaada ay aamineen shahwaadkooda. Waxay ilaaween xaqqii uu Alle ku waajib yeelay, waxayna raaceen hawadooda iyo macmacaanka adduunka. Reer bani-israa'iil waxay fidnadii ugu horaysay uga timid dumarka. Adduunyadu waa meel lagu nasto laakiin yaan

deegaan laga dhigan, qof walbaana maskaxda haku hayo in loo keenay sahay qaadasho keliya.

Abuu Saciid al-Khudri (Alle raali haka noqdee) wuxuu yiri: Nebigu (NNKH) wuxuu yiri: “Adduunyadu waa doog waana macaantahay. Allena xilkeedii buu idiin dhiibay oo inaad danjireyaal ka noqotaan buu idiin doortay, si uu u eego habka aad uga howlgaleysaan oo aad ugu dhaqantaan adduunka.

Marka iska jira dhaldhalaalka adduunka iyo soo jiidashadeeda dhalanteedka ah, iyo fasaadka ka dhalanaya la xiriir (aan sharci aheyn) ee dumarka (iyo in hawooyinkooda aan sharciga waafaqsaneyn laga yeelo). Reer banii Israa’iil fidmadii u horraysey waxay kaga timid xagga dumarka.

5. **Baryidda Alle:** Qofka muslimka ah, waa kan mar walba ku xiran Allaah, waydiistana denbi dhaaf, waa kan ogsoon waxkasta oo la baryo kan ugu wanaagsan in uu yahay Allaah. Wax badan waad aragtay Nebiga oo leh ruuxii kaca habeenkii oo Alle barya in uu siindoono wixii uu waydiistay Allaah. Alle waxaa uu inoo yaboohay ruuxii kaca habeenkii xilliyadu dadku hurdaan oo ducaysta waa uu helayaa wixii uu Alle weydiistay oo dhan.

   Alle wuxuu ku leeyahay war yaa wax iwaydiista oo aan siiyaa, war yaa maal iga dalban oo aan siiyaa, waryaa denbi dhaaf iga dalban oo aan u denbi dhaafaa. Miyay san ahayn in aad kacno saq dhexe habeenkii oo aan ka faa’idaysano jaaniskaa iyo yaboohaa

Alle. Ruuxii baryaa Alle waxaan ahayn waxaa hubaal ah in uusan helayn.

Tusaale, markii aad utagto qof oo aad dhahdo waxaan ubaahanahy in aad isiiso lacag intaa leeg, waxaa isbeddelaya wajigiisa. Waxaana ka dhadhansan kartaa in uusan ruuxaas ahayn mid raali ka ah in uu wax baxsho. Haddaba saas hadday tahay maad ka kaaftoonto oo Alle keliya wax waydiisato, Allaah ayaa kuu balan qaadaye.

Cabdullaahi Ibnu Mascuud (Alle raali haka noqdee) waxaa laga soo xigtay in Nebigu (NNKH) ku duceysan jirey: (Alloow waxaan kaa baryayaa hanuun, Dhowris xilka iyo waajibka aad i saartay, dhawrsanaan iyo kheyr xaggaaga ah (iyo ka deeqtoonaan Aadane).

Anas bin Maalik (Alle raali haka noqdee) wuxuu yiri: Nebigu (NNKH) Wuxuu yiri: “Qofkii yiraahda markuu guriga ka baxayo: (Bismillaahi, tawakaltu, calallaah, walaa xawla walaa quwwata illaa billaah).

Oo macnaheedu yahay:

(Waxaan ku baxayaa magaca Alle, anigoo kalsooni buuxda ku qaba iskuna halleynaya; Waa Alle midka bixiya awoodda xumaha iyo gefka lagaga leexdo, ama bixiya awoodda aad samo ku fasho. Ninkii sidaa yiraahdaa waa nin xaqii la tusay, xumaan iyo sharna

laga hayey, shaydaankuna waa ka fogaadaa). (Tirmidi iyo Abuu Daa'uud).

Abuu Daawuud wuxuu ku kordhiyey: "Shaydaan baa wuxuu ku yiraahdaa mid kale oo saaxiibkii ah Maxaad ka tareysaa nin la hanuuniyey, la kaafiyey, oo la dhowrayna?".

6. **Samaynta camal wanaagsan:** Waxaa laga rabaa qof kasta in uu la yimaadaa camal midba midka uu ka kheyr badan yahay. Waayo ruuxii sameeyaa wanaag Alle waa ujibaaraa wanaaga uu sameeyay ajarkiis. Haddii aan wacad ku marno in aan gudano wanaag sa waxaan aragnay wanaagii mid ka sii fadli badan waa in aan ku dhaqaaqnaa ka fadliga badan. Waxaad damacday in aad bixiso sadaqo kuna bixiso iskuul, waxaad aragtay masjid la dhisaayo waa in aad ku bixisaa masjidka isagaa fadli badane. Sababtoo ah bogcadaha Alle waxaa ugu fadli badan masaajidda, waxaana ugu xun suuqyada.

Caddayi ibnu Xaatim (Alle raali haka noqdee) waxaa laga soo xigtay in Nebigu (NNKH) yiri: (Haddii uu qofku dhaarto oo ballan qaado inuu camal falaa oo dabadeed arkaa camal kale oo ka wanaagsan kii hore, waa inuu falaa camalka wanaagsan ee dambe).

7. **Adeecidda Alle iyo mas'uuliyiintiina:** Waxaa nalafaray in aan adeecno waxkasta oo Alle soodejiyay, oo gudano wiixii nala ku waajib yeelay lana nimaadno wanaag oo dhan. Waxaa Alle inbadan qur'aankiisa ku yiri (Kuwii Alle iyo Rusuulkiisa

rumeeyow addeeca Alle iyo rasiilkiis). Waa in aan ahaana kuwo mar kasta ilaasha tiirarka islaamka, sadaqadana aan bixinaa, soonka, salaada, xajka iyo wixii kaloo nagu waajib noqdaa in aan la nimaadno.

Waa in aan adeecna dadka madaxda inoo ah, sababtoo ah waa masalo diini ah oo laga rabo qofkasta oo muslim ah. Qofka waliga ah waa in loo hogaansamaa wuxuu idin amrana la timaadaan oo fulisaan ilaa wixii aan xad gudub ahayn. Macaasida lagu adeeci mayo ruuxa hogaamiya ah sida aan ka fahmayno xadiiskaan.

Abuu Umaamah al-Baahili (Alle raali haka noqdee) wuxuu sheegay inuu dhageystay khudbadii Nebiga (NNKH) uu jeediyey xajkii sagootiga khudbaddaas oo uu ku yiri: (Xurmad iyo tixgelin gaara siiya Alle iyo amarradiisa, oo ooga shanta salaadood maalin waliba, bisha ramadaana sooma, bixiya sekada, maqlana oo adeeca kuwa xilka iyo mas'uuliyadda idin haya (oo waxaan xumaan aheyn ku adeeca) Waxaad geli doontaan markaa Jannada Rabbigiin). Tirmidi wuxuuna yiri waa xadiis Xasan ah.

Fiiro gaar ah: luqad ahaan macnaha taqwada waa inad ka joogto oo aad naftaada ka celiso wixii u xun oo dhib u leh. Xagga Xadiiska iyo Qur'aankase taqwo waxaa loola jeedaa in aad maanka joogto ugu heyso Alle, ood ka cabsato, xusuusnaato daa'in iyo abid. Wuxuu ku faray la timaado, wuxuu kaa reebayna ka harto, taasna waxay kuu horseedeysaa oo ku siineysaa aragti iyo ileys aad ku kala saarto samaha iyo xumaanta, dareenka iyo fahamkaasi qofku wuxuu

ku hoggaaminayaa xagga samaha iyo kheyrka, kana hor istaagayaa xumaha iyo sharka oo idil.

8. Yaqiinta iyo aaminaada Alle: Waa in aad tahay ruux leh yaqiin dhab ah. Markaadla timaado wixii Alle ku faray sidoo kalena waa in aad tahay ruux wixii loogu yaboohay aamin san. Haddii shaki kaa galo yabooha Eebbe, ma dhamaysna iimaankaaga waayo dadka Alle rumeeyay waa in ay rumeeyaan waxa qaa'ibka ah iyo waxa jooga. Waa in aad tahay qof caqiidadiisu sarayso, go'aan leh.

Musiibooyinka dhaca sida foolkaanaha, dhul gariirka, abaaraha iwm, dhammaantood qofka islaamka ah waxaa uga siyaada iimaan iyo xasilooni.

Mar uu Alle ka hadlaayay yaqiinta iyo isku halaynta Allaah. wuxuu yiri: "Markii mu'miniinta dhabta ahaa ay kooxihii isa soo baheystay ee gaalada ahaa arkeen waxay yiraahdeen: Waa kan wixii ay Alle iyo rasuulkiisu nooyabooheen. Alle iyo rasuulkiisu run bay sheegeen. Umana kordhin waxaan aheyn iimaan, isdhiibid iyo sugnaasho". Suuradda al-Axsaab: Aayadda 22.

Wuxuu kaloo yiri Alle weyne kor ahaaye: "Waa kuwii dadku ku yiri: Dadkii baa isu kiin soo bahaystay ee ka cabsada. (Khatartii lagu handaday) waxba uma dhiman iimaan uun baa u siyaaday maahee waxayna yiraahadeen: Allaa nagu filan wax la isku halleeyana u fiican. Waxay markaas la laabteen nicmo iyo gallad Alle, dhibaatona ma taaban. Waxayna raaceen raallinnimadii Alle, Allena

waxaa u sugnaaday gallad aan go’ayn. Suuradda aali-Cimraan Aayadaha: 173-174.

9. Talo saarashada Alle: Markii aad rabto in aad ku dhaqaaqdo shey ama ficil waa in aad tala saarataa Allihii ku abuurtay. Sababtoo ah ruuxii tala saarta Alle ma dayaco.

Alle qur’aankiisa wuxuu ku yiri (Haddii aad go’aansato shey talo saaro Allaah, Alle waa jecel yahay kuwa talo saartee).

Qofka mu’minka ah waa in uu la yimaadaa wixii Eebbe nafaray. Ma jiro ruux guulaysta ama hanta socdaalka nolosha ilaa uu la yimaado wixii nala faray oo asaaska nolosha ah.

Mar kale ayuu qur’aankisa ku yiri (Talo saaro oo isku hallee noolaha aan dhimanayn). Suuradda al-Furqaan: Aayadda 58.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye (Mu’miniinta Alle oo keliya ha talo saarteen, oo ha isku halleeyaan). Suuradda Ibraahiim: Aayadda 11.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye, (Markaad go’aan gaartid, Alle oo keliya talo saaro oo isku hallee). Suuradda ali-Cimraan Aayadda 159.

Wuxuu kaloo Alle yiri (Qofkii Alle talo saarta oo isku halleeya waa ku filan yahay). Suuradda ad-Dalaaq Aayadda 3.

Ibnu Cabbaas (Alle raali haka noqdee) waxaa laga soo xigtay in Nebigu (NNKH) ku duceysan jiray: (Alloow Adiga ayaan isku kaa dhiibey, Adiga ayaana ku rumeeyey, Adiga ayaana ku talo saartay, Adiga ayaan kuu soo noqday, Adiga ayaana arrintayda ugu xukuntamayaa oo gar soor uga dhiganayaa, Alloow awooddaadaan magan u ahay, Ilaah xaq ahi ma jiro adiga maahee, ee Alloow iga dhowr ka lumid xaqa aan kalumo.

Adiga weeyaan noolaaha aan dhimanayn, halka Jinka iyo Insigu dhimanayaan). (Bukhaari iyo Muslim).

Ibnu Cabbaas (Alle raali haka noqdee) waxaa laga soo xigtay in Nebi Ibraahiim markii dabka lagu riday erayadii uu ku dhawaaqay ay ahaayeen: (Xasbunallaah wanicmal wakiil). Waxaa igu filan Alle, wax la isku halleeyana waxaa u fiican Isaga.

Sidaa oo kalena waxaa yiri Rasuulkii Alle Muxammad (NNKH) kolkii loo sheegay in dad isu soo baheystay oo sidaa awgeed la yiri naftiinna u baqa, arrintanina waxay oo keliya u kordhisay isaga iyo muslimiintii imaankii ay ku qabeen Alle, waxayna yiraahdeen isaga iyo muslimiintii: (Waxaa nagu filan Alle Laysku halleeyaa fiicanna waa Isaga). (Bukhaari).

Cumar bin Khaddaab (Alle raali haka noqdee) wuxuu yiri: (Waxaan maqlay Nebiga (NNKH) oo leh: Haddii aad taladiinna oo dhan saarataan Alle oo u rumeysaan si dhan oo dhab ah wuxuu idiin irsaaqi doonaa sida uu u irsaaqo shimbiraha. Waxay kallahaan

subaxii iyagoo calool maran, waxayna soonoqdaan iyagoo calool buuxa oo dheregsan galabtii). (Tirmidi) wuxuu yiri waa xadiis xasan ah.

10. Khushuucidda Alle: Dad badan oo ka mida ummaddaha islaamka waxaa ku jira markii lagu dul akhriyo qur'aanka ama aayaadka Alle, in ay isbeddelaan quluubtooda ilaa ilinta ka timaadaa ay qoyso dhabanadooda ilaa ay ka gaaraan dhulka cabsi darteed.

Dadka qaarna markii lagu akhriyo aayaadka Alle, waxay ka qaadaan qooq iyo islaweyni waxayna ku danbayn dadka noocaas ah halaag iyo abaal marin weyn. Alle ha ina hanuunshee. Eeg xadiiskaan oo fahan.

Abuu Hurayrah (Alle raali haka noqdee) wuxuu sheegay in Nebigu (NNKH) yiri: (Dad badan waxay geli doonaan jannada kuwaa oo ay quluubtooda noqon doonto sida quluubta shimbiraha, taana macnaheeda waxaa weeye quluubtoodaa waxay noqoneysaa sida quluubta shimbiraha, mise waxay noqon doonaan kuwa qaneeco leh, ama quluubtoodaa noqon doonta mid jilicsan cabsi Alle darteed, (taa oo keeneysa inay jannada galaan)). (Muslim).

11. Kalsoonida: Waa in aad tahay ruux ku kalsoon Allah markasta oo leh caqiido dhab ah. Ruuxa Alle aaminsan marna ma waayo kaalmo kaga timaada dhanka Eebbe. Haddii aad tahay qof Alle ku kalsoonayn waligaa gaari maysid liibaanta adduun iyo aakhiro.

Sidoo kalena waa in aad tahay ruux kal sooni ku qaba naftiisa, aaminsan in uu qaban karo waxkasta. Eeg xadiiskaan waxaan ka faa'idaynaa kal soonida iyo cafiska aad cafido ruux dhib ama denbi kaa galay oo aad cafido.

Jaabir (Alle raali haka noqdee) wuxuu sheegay inuu la socday Nebiga (NNKH) oo dagaal jihaad ah ugu socday dhinaca Najd, markii dagaalkii dhammaadayna uu la soo laabtay. goor harsimaad ah baa wuxuu duulkii soo gaaray tog leh geedo qodxa badan, halkaasoo rasuulku (NNKH) harsaday geed qurac ah, asxaabtiisiina ay kala firidhay iyadoo qof waliba har wanaagsan dayanayo. Nebigu wuxuu surtay seeftiisii laan ka mid ah laamihii geedka, seexdayna.

Innaguna sidoo kale baynu u nasaneynay, mise goor dambe baan maqallay Nebigii (NNKH) oo noo yeeraya. Waa u nimid si degdeg ah mise nin reer miyi ah baa agtiisa fadhiya. Nebigu (NNKH) wuxuu innagu yiri: "Ninkani anigoo hurda yuu seeftaydii iila baxay.

Waxaan toosay iyadoo gacanta ugu jirta oo gal la' wuxuuna igu yiri: Yaa hadda iga kaa badbaadin kara? Waxaan ku iri: Alle baa iga kaa badbaadinaya kuna celceliyey weedhaa seddex jeer. Nebigu (NNKH) sare buu u soo fariistay, waxnana ma yeelin ninkaasi. (Bukhaari iyo Muslim).

Werin kale ee xadiiska oo isla jaabir (Alle raali haka noqdee) laga soo xigtay waxay aheyd: Waxaynu la soconnay rasuulkii Alle (NNKH) dagaalkii Daatir Riqaac. Waxaan nimid geed hoos weyn markaasaan uga tagnay (Nebiga) inuu ku nasto. Waxaa yimid nin

mushrig ah arkayna seeftii Nebiga (NNKH) oo geedka suran, seeftii buu inta galka kala baxay buu ku yiri: Miyaad iga baqeyn? Wuxuu ku jawaabay Nebigu, may, dabadeed ninkii wuxuu yiri: yaa weeye kaa iga kaa badbaadinaya? Nebigu (NNKH) wuxuu ku jawaabay: Allaah.

Abuubakar Ismaaciili wuxuu intaa ku daray oo kitaabkiisii ku qornaa : Markii uu Nebigu (NNKH) yiri Alle baa iga kaa badbaadinaya ayaa ninkii gacantiisii seeftii ka dhacday; markaasaa Nebigu (NNKH) inta qaatay ku yiri: Yaa hadda adiga iga kaa badbaadinay? Ninkii wuxuu yiri: Noqo qaataa kheyr leh. Nebigu (NNKH) wuxuu weydiiyey: Ma aad qireysaa Ilaah xaq ah aan Alle ahayni inuusan jirin iyo inaan aniguna ahay Rasuulkiisii? Ninkii waa diiday wuxuuna yiri: Laakiinse waxaan kaa ballan qaadayaa inaanan kula diririn, cid kula diriraysana kuula soo safan. Nebigu (NNKH) waa uu sii daayey.

Qoladiisii buu ku laabtay oo ku yiri: Waxaan idiinka soo laabtay oo xaggiisa ka imid ninkii u fiicnaa dadka.

Abuu Bakar Siddiiq (Alle raali haka noqdee) bin Cabdullaah bin Cusmaan bin Caamir bin Cumar bin Kacab bin Sacad bin Taym bin Murrah bin Kacab bin Luway bin Qaalib al-Qurashi al-Taymii oo isaga iyo aabbihi iyo hooyadi intaba saxaabi ahaa waxaa laga soo xigtay: hadalkan: Kolkii Rasuulkii Alle (NNKH) iyo anigu aan ku dhuumaneynay godkii ayna na baadi goobayeen qolooyinka Makka, ayaan waxaan arkay cagihii mushrikiinta oo dushayada ah oo godka afkiisa debedda ku sugan. Waxaana iri: Rasuul Alloow, haddii uu

midkood cagihiisa fiirin lahaa waa ina arkilahaa. Wuxuu yiri: “Abuu Bakaroow bal ka warran labo Alle uu ku yahay seddex”. (Bukhaari iyo Muslim)

12. Ku Toosnaanta Diinta Alle: Qofka waxaa laga rabaa in uu ku dadaalo waxkasta oo la amray sababtoo ah haddaad go’aansato in aad marto wado toosan waxaa hubaal ah in aad gaaraysid. Inbadan oo dadka ka mid ah waxay ku hamiyaan in ay isaga safraan iyagoon aqoon halka ay usocdaan iyo barta ay ka yimaadaan.

Haddaad hayso wado oo ay ka yaacaan wadooyin yaryar, haraacin kuwa yar yar waxaa lagayaabaa in kuwa yar yar ay shaydaamadu fadhiistaan.

Alle subxaana watacaalaa wuxuu yiri: (Ku toosnow siraadka mustiqiimka ah (jidka toosan ee xaqa ah) sida laguu faray). Suuradda Huud, Aayadda 112.

Wuxuu kaloo yiri Allaah: (Kuwa yiraahda: Rabbigayo waa Allaah, dabadeedna toosnaada, malaa’ig baa ku soo degta (kuwaa markay dhimanayaan oo ay naftu ka sii baxeyso) ku leh: Ha cabsannina, ha murugoonnina, oo ku bishaareysta Jannadii la idiin yaboohay.

Annagaa ah gacalkiin idin dhowraya adduun iyo aakhiroba. Xagga Jannadana waxaa idiin yaal wixii ay naftiinnu rabto oo dhan iyo wixii aad u yeerataanba. Waana martiqaad ka sugnaaday dambi dhaafe naxariis badan). Suuradda Fusilat: Aayadaha 30 -32.

Wuxuu kaloo yiri Alle weyne: (Kuwii yiri: Rabbigayo Waa Alle, dabadeedna xaqa ku toosnaaday oo aan dhinacna ugaleexan, cabsi korkooda ahaan mayso iyo murugo. Waana ehlu Janno kuwaasu, dhexdeedayna ku waarayaan, Camalkii wanaagsanaa ay falan jireen darti). Suuradda al-Axqaaf, Aayadaha 13,14.85.

Sufyaan ibnu Cabdullaah (Alle raali hakaa noqdee) wuxuu yiri: Waxaan ka codsaday Rasuulkii Alle (NNKH) arrintaan anigoo ku iri: Waxaad iga siisaa cashar dhan iyo darsi waantow iyo hanuun leh Islaamka oo aanan dabadaa waydiineyn cid kale.

Wuxuu yiri (NNKH) (Dheh: Alle ayaan Rumeeyey, dabadeedna xaqa raac oo ku toosnow). (Muslim).

Abuu Hurayrah (Alle raali haka noqdee) wuxuu yiri: Nebigu (NNKH), (Raaca mabaadida iyo qodobbada diinta oo si wanaagsan u dhowra, ahaadana xaqaaniyaal jidka Alle ku toosan, oo ogaada inuusan qofkiinna camalkiisa ku badbaadi karin.

Nin baa wuxuu weydiiyey: Ma xataa adiga Nebi Alloow? Wuxuu yiri: “Xataa aniga, in Alle naxariistiisa iyo galladdiisa i dhex geliyo maahee). (Muslim)

Fiiro gaar ah: Culimadu waxay yiraahdaan ku toosnaanta xaqa waxaa loola jeedaa inaad Alle adeecdo, oo awaamirtiisa aad fuliso qowl iyo ficil, farid iyo reebid, iyo inaad noolaato nolol aad ugu hoggaan santahay addoon dhab ahna ugu tahay Allahii ku abuuray.

13. Ku cibro qaadasho: Eeg markaad socoto wadooyinka wixii makhluuqaad ah oo Alle sameeyay, oo ku tusaalo qaado. Alle wuxuu sameeyay cir iyo dhul iyo wixii ku dulnool.

Waxa u dhex dhigay buuro, wuxuuna ku hayay bartooda iyagoon dhaqaaqin. Sidoo kalena aan burburin ilaa amarka Alle mooyee.

Alle wuxuu sameeyay bad iyo biri midkastaana waxaa ku nool noole. Saw ma ahan in aan ku cibro qaadano wixii Alle uumay oo dhan. Alle wuxuu kugu manataystay nimcooyin aad ubadan sida caafimaadkaaga, lixda lixaad oo kuu dhamaystiran. Waxaad aragtaa dad cago la', sidoo kalena dhego la' dhammaantoodna waxaa ku sugan aayaad iyo cibro qaadasho.

Ka Fakaridda Uunka Ilaahay iyo Waxyaabaha inagu hareersan. Alle kor ahaaye wuxuu yiri: "Ku dheh (Muxammadow) Waxaan idinku waaninayaa hal mas'alo, waa inaad dar Alle laba labo iyo mid mid ugu istaagtaan dabadeedna fekertaan". Suuradda Saba: Aayadda 46.

Wuxuu kaloo yiri: kor ahaay. "Abuurista cirarka iyo dhulka iyo isdhaafka habeenka iyo maalinta, calaamooyinbaa ku jira muujinaya (awoodda iyo ku keli ahaanshada Alle maamulka uunka iyo mulkigiisa iyo mudnaantiisa keligi cibaadada) waxayna ugu jirtaa kuwa wax garadka ah. Kuwa xusa Alle, joog, fadhi, iyo jiifba, oo kafakara abuurista cirarka iyo dhulka oo (yiraahda) Rabbiyoow waxa kan dheel uma aadan abuuran. Adaa Hufan, Innaga dhowr cadaabta naarta". Suuradda aali-Cimraan: Aayadaha 190 - 191.

Wuxuu kaloo yiri Alle hufnaaye: “Ma waysan fiirinayn geela, sida loo abuuray? Iyo cirka, sida loo bilay? Iyo buuraha, sida loo qotomiyey? Iyo dhulka sida loo goglay? Waani, waaniye kaliyaad tahaye”. Suuradda Al-Qaashiya: Aayadaha 17 - 21.

Wuxuu kaloo yiri Alle weyne: “Ma weysan dhulka marin oo fiirin ciribta qoomankii iyaga ka horreeyey? Suuradda Muxammad; Aayadda 10.

1**4. Kheyrka oo lagu tartamo:** Haddaad doonayso in aad ka gun gaadhid noloshaada iyo wixii ku hareeraysan oo dhan, waxaa lagaa rabaa in aad la timaado wixii lagu amray oo ka harto wixii lagaa reebay.

Sidoo kalena waxaa inaga nala karabaa in aan ku tartano kheyrka Alle sida tartanka loogu galo guulaha. Tusaale, markaad doonayso in aad badiso sida koob ciyaareed, tartan aqooneed , baradan, socod iyo ciyaaraha barafka kuwaas oo laysku siiyo bilado iyo abaal marino ay bixiyaan bini-aadan waa lagu dadaalaa naf iyo maalba waa loo huraa. Laakiin markii loo leexdo kheyrka Alle, dadku waxaa hela sheydaan oo waa laga indho saabaa ajarka iyo yabooha Alle.

Alle kor ahaaye waa kan keliya oo wax baxsha waa Allaah, cidkale oo bixisaa ma jirto. Dadku waxay baxshaan waa dhalanteed, waxaas oo dhan waxaa ka fiican ajarka iyo karaamada uu Alle weyne ku siiyay.

Sadaqa oo aad bixisaa waxay ka mid tahay kheyrka Alle. Sidoo kalena masaajida oo u tartantaan waxay ka mid tahay kheyrka oo loo tartamaa.

Khayr ku dadaalidda Alle kor ahaaye wuxuu yiri: “Khayraadka ku tartama”. Suuradda al-Baqara: Aayadda 148.

Wuxuu kaloo yiri Alle weyne kor ahaaye: “U tartama dambi dhaafka Rabbiggiin iyo Janno balleceedu le’egyahay cirarka iyo dhulka oo loo diyaariyey kuwa iska dhowra xumaha”. Suuradda aali-Cimraan: Aayadda 133.87.

Abuu Hurayrah (Alle raali haka noqdee) wuxuu yiri: Nebigu (NNKH) wuxuu yiri: (Ku dadaala Camalka san, waqtina ha luminina aad ku sameyn kartaan camal suubban waxa imaan doona dhowaan fidmooyin iyo fasaad sida habeen madow ah oo qofka waagu u beryayo isagoo Mu’min ah, isagoo gaal ahna gabbalku u dhacayo, ama isagoo mu’min ah gabbalku u dhacayo, isagoo gaal ahna waagu u beryayo. Wuxuu diyaar qofkii u noqon inuu diintiisa siisto xoogaa wax adduun ah). (Muslim).

Cuqbah ibnu Xaaris (Alle raali haka noqdee) wuxuu yiri: (Waxaan kula tukadey Nebiga (NNKH) Salaad Casar magaalada Madiina.

Markii uu salaama naqsaday buu inta deg deg u kacay oo dadkii dhexmaray buu wuxuu aadey guryihiisii. Markii deg degtiisa la arkay baa la naxay. Kolkuu soo laabtay, buu wuxuu yiri isagoo sharxaya waxa uu keenay degdegta: Waxaan xusuustay wax xoogaa

qalin ama dahab ceeriin ah oo guriga yiil, marka arrintaa baa i welwel gelisay. Waxaan hadda soo qorsheeyey in la qaybsho). (Bukhaari).

Werin kale oo xadiiska waxay ahayd: (Waxaan guriga uga soo tegey wax xoogaa dahab ceeriin ah oo sadaqo ah, marka waxaanan rabin inuu igu baryo). (Bukhaari).

Jaabir (Alle raali haka noqdee) wuxuu yiri: Nin baa maalintii Uxud Nebiga (NNKH) wuxuu ku yiri: Haddii la igu dilo dagaalka xaggee aadayaa? Wuxuu ugu jawaabay: Jannada. Ninkii xabbado timir ah oo gacantiisa ku jirey buu inta tuuray dagaalkii galay dirirayna jeer u shahiiday. (Bukhaari iyo Muslim).

Abuu Hureyrah (Alle raali haka noqdee) wuxuu yiri: Nin baa Nebiga (NNKH) u yimid oo weydiiyey: Sadaqada teebaa u ajar badan? Wuxuu ku jawaabay (NNKH): (Tii aad bixiso adoo caafimaad qaba, oo lexe jeclo ku hayso, oo faqri ka baqaya, inaad wax kororsataana ay kugu jirto oo jecel. Ha u dib dhigin bixinta sadaqada inta ay naftu dhuunta ka imanayso, markaasna aad dhahdo: hebel baa intaas leh, hebelna intaas, oo ah goor ay iyadii yeesheen hebel iyo hebel). (Bukhaari iyo Muslim).

Anas (Alle haka raali noqdee) wuxuu yiri: Nebiga (NNKH) wuxuu kor u qaaday seef maalintii Uxud oo yiri: Yaa seeftan iga qabanaya? Nin walbaa inta soo taagey gacmaha buu yiri: Aniga, Aniga. Nebigu (NNKH) wuxuu yiri: “Yaa mudankeeda ku qaadanaya oo gudanaya xilkeeda? Waa la is buurtay.

Abuu Dujaanah (Alle raali haka noqdee) baa yiri: “Anigaa mudankeeda ku qaadanaya oo gudanaya xilkeeda, markaasuu weecda kaga dhigay mushrikiintii”. (Muslim).

Zubayr Ibnu Caddiyi wuxuu yiri: waxaan u tagnay Anas Ibnu Maalik annagoo uga eed sheeganayna dhibta Xajjaaj bin Yuusuf (oo ahaa xaakim daalim ah waqtigii xukunkii reer Ummaya).

Wuxuu innagula taliyey inaan sabarno yirina: Saman waliba kan xiga ka shar badan oo ka xun. Waxaan sidaas ka maqlay Nebigii (NNKH). (Bukhaari).

Abuu Hurayrah (Alle raali haka noqdee) wuxuu yiri: Maalintii dagaalkii Khaybar, Nebigu (NNKH) wuxuu yiri: “Waxaan u dhiibayaa calanka nin Alle iyo rasuulkiisuba jecel yihiin oo guusha Alle isaga raacin doono. Cumar (Alle raali haka noqdee) wuxuu yiri: Marnaba madoonin madaxnimo, laakiinse maalintaas keliyaan jeclaaday in fursaddaas la i siiyo. Wuxuuse Nebigu (NNKH) u yeeray Cali Ibnu Abii Daalib una dhiibey calankii oo yiri: “Soco oo gadaal ha soo dhugan jeer guusha Alle ku siiyo”.

Cali (Alle raali haka noqdee) markii sidaa lagu yiriba, inta xoogaa socday oo markaa istaagey isagoo aan gadaal soo dhugan ku weydiiyey cod sare su’aashaan: Rasuulkii Alloow (NNKH) maxaan dadka ku la diriraa? Wuxuu ku jawaabay: “La dirir intay ka qiraan inuusan jirin cid caabudaad mudan Alle maahee iyo in Muxammad

yahay rasuulkiisii. Haddii ay sidaas yeelaan, dhiiggooda iyo maalkoodiiba waa in la nabad geliyaa oo aan lagu xadgudbin.

Dabcan waxaa saaran wixii xil iyo waajib ah oo shareecadu fartay sharcigaana lala tiigsan haddii ay la yimaadaan ashahaadada wax waxyeelaya.

---

1. Qaybta taqwada haddaad ku aragto khaladaad, fadlan iisoodir meesha khaldan iyo wixii aad ku darayso E-mail igu soodira

---

HALGANKA NOLOSHA

Marka hore qofku waa in uu iswaydiiyaa maxaa tahay adi? Qof noocee ah ayaa tahay? Sidee unooshahay? Maxaa dadka kale kaga duwantahay? Ma qof wanaagsan baatahay mise qof xun? Sidee isku tihiin socdaalka nolosha? Waa kuma qofka aad rabto in aad noqoto? Maxaa naftaada ka badali kartaa? Su'aalahaas iyo kuwo kale oo badan ayaan rabnaa in aan iswaydiino.

Haddaba waxaa lagaa rabaa in aad tiraahdo ani waxaan ahay ruux nolosha kaga jira dabaqad hoose, waxaana ahay ruux aan bulshada ku lahayn sucmad, waxaan ahay ruux aan lahayn karti, waxaan ahay ruux nacay nolosha iyo sida aan u noolahay. Waayo soomaalidu waxay dhahaan "Habacsani heer kuma gayso". Taas oo ay ula jeedaan qof isagu isnacay cidna ma gayn karto darajo uusan lahayn, mana ka dhigi karto halyay iyo ruux lagu hirto.

Balse deegaanka iyo meesha aad ku nooshahay waxay saamayn ku yeelan kartaa hab nololeedkaaga sababtoo ah haddaad ku nooshahay deegaan lagu bahdilo dadka waxaad noqon qof bahdilan oo fakar iyo hal abuurtoona lahayn. Balse haddaad joogto bay'o lagaa ixtiraamo, qadarin, qiimo, magac iyo maamuus ku leedahay waxaad noqon qof leh han sare kana gudba mar xalad kasta oo noloshaada ku ah lid iyo caqabad. Waxaadna ugudbi marxalad aad usaraysa oo aan lagaarin abid.

Waxaad dhahdaa ani waxaan ahay ruux aan bulshada kaga jirin baal dahab ah, aysan cidna itirsan, haddaan joogana aan lay magacaabin haddaan tagana aan lay soocelin haddaan maqanahayna aan

laytabin. Asii aan maanta rabo in aan iska beddalo dhaqankaa oo aan noqdo qof bulshada ka dhex muuqda leh magac iyo maamuus haybad iyo sharaf.

Waxaana jeclahay in laygu yeero halyaygii dunida, markii lay arkana in fadhiga layga kaco, markii aan maqanahayna lay tabo oo lay raadsho, markii aan tagana lay soocesho. Soomaalidu waa iyaga dhaha "Meesha ka muuqo ama ka maqnow", waa in aad tahay qof meel walba aad joogto laga ixtiraamo adna ixtiraama dadka kula nool iyo kan kuu ah cadawga iyo kan kuu ah saaxiibka.

Hadda ka hor ayaa waxaa jiray nin reer miyi ah oo ka mid ahaa dadka reer guuraaga ah, waxaa laqaban jiray shirar iyo Allabari. Haddii shir laqabtana ninkaa looma yeeri jirin, haddii uu hadlana lama dhagaysan jirin, haddii uu tagana lama soocelin jirin. Sababtu waxay ahayd ninkaan reer miyiga ah malahayn geel, taas ayaana keentay in aan laqiimayn ninkaa.

Duruuftuna waxay kuu horseedaa in aad maqaamkaagii hoos uga dhacdo oo aadan yeelan hami sare iyo in aad la tartanto dadka dhigaaga ah balse nacas ayaa isdhiiba kaasoo nolosha ka quustay.

Ninkii waxa uu go'aansaday in uu waxka bedelo hab dhaqankaa oo uu samaysto hanti iyo maal farabadan si hadhow dadkaan uga danbeeyaan.
Waxa uu tabcaday geel farabadan oo gaaraya boqolaal, waxa uu yeeshay ari gaaraya kun, waxa uu yeeshay lo'aad badan iyo gammaan. Waxaa dhacday in lays kugu yimid shir, waxaana yimid

ummad aad ubadan. Waa lays dhugtay mise shirka waxaa jooga ninkii hebel ahaa oo layasi jiray hadda ka hor. Waxaa la dhahay shirka waxaa inoo furaya hebel isagaana inoo daadihinaya.

Markaas ayaa dadkii oo idil dheheen hebelow noo daadihi shirka, qof aan adi ahayn maanta shirkaa ma wadaayo. Markaas ayuu inta fariistay oo afka kor utaagay yiri "Geelow tali oo shirka daadihi".

Waxay noqotay hadal aad laysla dhexmaray, dad badan iswaydiiyeen waxa uu ula jeedo geela talin. Halkaa waxaan ka daliishan karnaa in dadka badankiisa isku qadariyaan maalka laakiin aysan eegin waxkale. Waxaad aragtaa dad leh aqoon, xikmad iyo awaal dheeri balse lagu naco daruufo iyo waxaan micno lahayn.

Dadka noocaas ah oo tixgaliya hantida iyo dhaldhalaalka adduunyada waxay keentaa in ay ka dib dhacaan salaanka nolosha.

Sababtoo ah waxay ilaaween in maalka badan uu Alle baxsho ciddii uu rabana siiyo ciddii uusan rabina siin. Waxay kaloo ilaaween in maalku yahay fidno oo laysku imtixaamaayo xisaab adagna ka danbayso qofkii uu Ilaahay siiyo.

Waxay kaloo hilmaameen in qofka caydha ah uu Alle ka dhigay iyadoo lagu imtixaamayo dadka hantida leh. Waxay moodeen dadka xoolaha badan lasiiyay in uu Alle jecelyahay, dadkana laga doortay. Kuwa faqiirka ahna uu Eebahay nolosha ku cadibay oo lanacay.
Xikmad ayaa ahayd saddex yaysan ku dagin "Maal, dumar iyo adduunyo". Balse anagu haddaan nahay bini-aadam waxaan

israacinay adduunyo oo waxaan ilownay in waxakan ay yihiin maalmo qudha ka dibna ay dhammaanayaan.

Waxaa iswaydiin mudan in aad isa su'aasho ani dadka maxaan dheerahay? Waa in aad tiraahdo, ani waxaan dheerahay dadka kale karti, aqoon, Alle ka cabsi, xaq udirir, magac iyo maamuus. Waxaan ahay qof leh han sare waxaan qaban karaa waxkasta oo aadane keenay, waxaan awoodaa in aan sameeyo wax cusub oo aan horay loo ikhtiraacin.

Waxaan ahay shakhsi leh dabci wanaagsan, bulshadana waxaan kula dhaqmaa dabeecad dadka aysan ku dhaqmin. Waxaan ahay ruux leh naxariis waxaan caawiyaa oo u gargaaraa dadka tabaalaysan oo dhan. Waxaan ahay ruux maarayn kara nolosha.

Haddaad ka dhaadhiciso ruuxda in aad tahay qof hogaaminkara nafta oo u horseedikara guul iyo barwaaqo waa in aad lahaataa mowqif adag iyo howl karnimo. Taas waxay kuu sahlaysaa in aad ahaato shakhsi hadafkiisa ka mira dhaliya iyo yoolkiisa.

Markaan dib ujaleecno dadka guulaystay oo dhan waxay soomareen nolol tii ugu darnayd abid. Markaad u fiirsato habnololeedkooda waxaad isdhihin dadkaan ma ahayn bini-aadam sababtoo ah adkaysinka iyo dulqaadka ay usoomareen guulahooda. Waxaad aragtaa dad badan oo ku sookoray rafaad, silac, darxumo, hoy la'aan, hiilo la'aan, taakulo la'aan, darbi jiif IWM. Balse maanta gaaray heer darajo sare kuna nool nolol tan usaraysa, waxayna ku nool yihiin nolol raaxo leh oo aysan ku noolayn dad ka badan

malaayiin. Waxaana taas keenay waa saburkii iyo dulqaadkii ay umuujiyeen halgankii noloshooda.

Alle kor ahaaye waxa uu qur'aankiisa ku yiri (Haddii aad go'aansataan arrin, talo saarsada Allaah, Allena waa jecelyahay kuwa talo saarsadee).

Waxaan ka fahmaynaa in waxkastoo aad ku dhaqaaqayso aad talo saarsato Allaah si ay kugu fududaato arimahaaga oo dhan una gaadho dhammaan guulahaaga.

Qofkii Ku kalsoon naftiisa, awoodeeda waxaa hubaal ah in uu gaarayo meel Allaale iyo meesha uudoono. Waxaana keenaya waa kalsooni uu ku qabo awoodiisa iyo naftiisa waxayna u horseedaysaa in uu ku noolaado nolosha tan ugu saraysa.

Soomaalidu waxay dhahdaa (Nimaan dhididin ma dhergo) oo waxay ula jeedaan qof aan marin rafaad, silic marna magaaro nolol tan usaraysa, mana gaaro meesha uurabo waayo ma uusan shaqaysan waqtina kuma lumin dantiisa. Waa halka ay dadku ka yiraahdaan (Xaglo laaban xoolo kuma yimaadaan). Taas macnaheedu waa in la shaqaysto, lagana faa'idaysto awoodaada iyo waqtiga aad haysato.

Waxaa laga sharqamiyaa marar badan guulo lagaaray, balse adi ma iswaydiisay guulahaas seebaa lagu gaaray? Waa su'aal mudan in aad waydiiso naftaada waayo waxaad helin hilin ama wado aad umarto guusha iyo qaabkii aad umaamuli lahayd awoodaada adoo ka

faa'idaysanaya xiribtaada uu Alle ku siiyay. Soomaalidu waxay dhahdaa (Nimaan rafaad marin raaxo ma gaaro).

Waxayna ula jeedaan, nolosha guud ahaan waxay ku dhisantaa rafaad waxayna ku idlaataa raaxo waa halka ay dadku ka dhahaan (Nimaan shaqaysan shaah waa ka xaaraan).

Markale waa iyaga dhaha (Ninkii seexdaa sicii dibi dhalay). Waxaan ka fahmaynaa arrintaa in noloshu tahay mid isbedesha, lana jaanqaada hadba wacyiga lagu jiro. Maalin waxaad ku noolaan nolol tan ugu saraysa marna nolol tan ugu liidata.

Laakiiin waxaa lagu amray in aad shaqaysato, muruqaaga wax kula soobaxdo. Waxaa la dhahaa (Shaqo waa sharaf), waana halka uu Nebigeenu nagala dardaarmay. Waxa uu bogaadiyay in aan shaqaysano, gacantayada wax kula soobaxno.

Cumar bin Khadaab ayaa arkay rag waaweyn oo masjidka isaga jira oo aan shaqo tagayn? Markaas ayuu ku dhahay maxaa la shaqaysan waydeen markaas ayay dheheen Alle ayaa nasiinaya hanta marke waanu cibaadaysan, waxa uu ku yiri ma arki karo qof danbe oo fadhiya masjidka.
Waxaan ka fahmaynaa in shaqadu ay tahay mid aad loo adkeeyay sharafna ay tahay. Kawaran haddaad ku nooshahay shaxaad iyo in aad shilimaad waydiisato dadka iyo adoo shaqaysta, waxna lagu waydiisto? Ma isku mid baatahay? Jawaabtu waa maya.

SIDEE BAAN UMAARAYN KARNAA GEEDDI SOCODKA NOLOSHA?

Noloshu waa mid saamayn ku leh bini-aadamka, mid waa lagu ciriirshaa midna waa loo waasiciyaa. Dad badan oo dunida kunooli waxay uqabaan in dadka oo dhani dhereg u dhintaan oo aysan jirin gaajo iyo faqritoona.

Hadda ka hor waxaa dhacday in gabar uu dhalay madaxweyne ka mid ahaa madaxdii soomaray dalka maraykanka ayaa laga dhaadhicin waayay waxaa jira faqri iyo gaajo. Sida aan ka dareemayno sheekadaa dadku Alle ma simin oo waxaa la yahay shanta farood oo kale.

Mid waa taajir oo waxa uu haystaa maal uu sidii uu doono ugu tamashlayn karo, siddii uu doonana ka yeela. Waxaa jira ruux aanba helin quutal daruuriga iskadaaye in uu helo maal farabadan iyo in uu saddexda waqti quuto quut dhamaystiran.

Oday ayaa wiilkiisa yiri aabbe ina keen waan baxaynaa maanta markaas ayuu ku dhahay aabbe xagee aadaynaa? Waxa uu ku yiri waxaan rabnaa in aan aragno gaajada waxay tahay iyo hoy la'aanta iyo farqiga udhexeeya?.

Wiilkii ayaa yiri aabbe ma gaajaa jirta haa waa ay jirtaa inakeen aan ku sootusee?. Wiilkii iyo odaygii waa israaceen waxaa la socday socdaal aad u dheer. Waxaa ka dhammaatay sahaydii ay haysteen oo dhan waxaa helay gaajo iyo haraad, waxaana isku dhegay dhebxanagi, calyadii ayaa ka soo fuqi wayday.

Markaas ayuu wiilkii dhahay aabbe xagee noo wadaa gaajoonaye, haraadna waa noo dheeraaday? Odaygii ayaa wiilkii eegay oo dhahay aabbe waxaan rabnaa in aan aragno gaajo waxay tahay markaas ayuu wiilkii dhahay aabbe dhimanaye ma gaajaa noo hartay? Markaas ayuu dhahay aabbe haa gaajo ma aadan arag iyo faqri toona ilaa aad ku noolaato nolol ciriiri ah, oo waydo saddexda waqti wax aad quudato. Markaas ayuu dhahay aabbe taasi waa dhib ee inakadaa dhimanaye anagaaba la' saddex waqti wax aan quudano. Gaajana bartay iyo haraad in ay jiraan.

Odaygii ayaa yiri xikmadaan kooban, dad waxaa ugu nasiib badan ruuxii leh

A). Qalbi wax og

B). Jir sabra

C). Iyo in uu ku qanco waxa gacantiisa ku jira

Taas waxaan ka fahmaynaa in nolosha oo loosabraa ay tahay mid wanaagsan sababtoo ah waxaa Alle qur'aankiisa ku yiri "Ruuxa Ilaahay ka baqa ee sabra Ilaahay ma lumiyo ajirka dadka wanaagsan". Sabarku waa shey qaaliya oo aan la heli karin.

Nebi Ibraahim calayhi salaam waa tii uulahaa markii la yiri wiilkaagii Yuusuf diib baa cunay. Waa tii uu yiri "Waan sabrayaa

sabir qurux badan". Haddaba waxaan ka fahmaynaa in saburku yahay shey qaaliya oo aan la dhayal san karin.

Xasanul Basri wuxuu yiri:

A). Qofkii aan edeb lahayni cilmi ma leh

B). Ruuxa aan samir lahayni diin ma leh

C). Ruuxa aan xalaal quute ahayni wax la dhawaysto ma leh.

Waxaan ka fahmaynaa xikmadaa kooban in samirku yahay udub dhexaadka nolosha waayo (Ruuxaan samrin sadkiis ma helo), ayay soomaalidu dhahdaa. Waa in aad u adkaysataa nolosha dhibkeeda, samir tan ugu quruxda badan kii uu samray Nebi Ibraahim calayhi salaam.

Qof walbaa in uusan hilmaamin in aan lagu waarayn dunidaan oo qof walba uu ku yahay marti, kana tagidoono isagoo aan haysan bar adduunyo. Waa tii uu lahaa Xaatim Al Asam: Maalinkasta oo isoo marta sheydaanku wuxuu idhahaa Maxaad cuntaa? Maxaad lebbisataa? Xaggaad dagin?

Wuxuu yiri waxaan ku iraahdaa

A). Waxaan cunaa geeri

B). Waxaan lebbistaa kafan

C). Waxaan degin qabri.

Waxaan ka faa'idaynaa xikmadaa kooban in halganka noloshu tahay mid sahay qaadasho aakhiro aysan ahayn mid lagu daa'imaayo adduunyo sababtoo ah waa tii la yiri: Afar shey afar kuguma simaan.

A). Hantidu taajirnimo kuguma siihayso

B). Xinnaysino shaabnimo kuguma sii hayso

C). Daawona caafimaad kugu ma siihayso

D). Nololina sii jirid kuguma sii hayso

Waxaad eegtaan gabaygaan ay ka buuxdo xikmado iyo waano qaadasho waana gabay wacdi ah. Waxaana gabaygaan la dhahaa Haddii Dunida Lagu Waarayo.

Abwaanka waxaa la dhahaa Yuusuf Cabdulle Muuse, waxa uu arkay in uu noqday sheyb. Waxa uu go'aansaday in uu dadka raad kaga tago lana dardaarmo. Wuxuuna dadka kala siidardaarmayay waxyaalo nolosha ku saabsan ee dunida la xiriira.

Wuxuuna Yiri:

1. Haddii dunida lagu waarayooy daayin noqoneyso
2. Waxaan laga dileen Nebiyadii laysu soo diraye
3. Asxaabihii baan degeen daahirka ahaaye
4. Faadumo iyo dirkeedii ayaan dumug yiraah deene
5. Daahaa ku noolaan lahaa deleg yadoodiiye
6. Anse waxaan daliishaday inaan laga dambeyneyne
7. Dowliilka uun baan arkiyo diray arwaaxdiiye
8. Durdurkii makaad iyo xajkaan daalib leeyahaye
9. Deeblahabkaan geela iyo ariga waa dalaal marane
10. Daaraha la weegaarayaa waa adduun dumaye
11. Udadaala diintiyo waqtiga daacadna ahaada
12. Cabdalaha dushiisiyo ayuu deyro kale sheegan
13. Darkii odayadii hore xidheen dawgu yuu gonin
14. Doqon xaajo waa kaa dilaa dibadaba u tuura
15. Shisheeyuhu hadduu idin danqaro dogob u nooleeya
16. Rag idaaya kaama tagee dab u fagaareeya
17. Meeshii daleelaa musaka bahalku doontaaye
18. Duldhabaha waxa loo saarayaa yaan dugaag marine
19. Is dugsada walaal kala durkaa dagan dharaartaase
20. Anna dulka aan celinayiyo daadka aan moose
21. Dal shisheeye waagaan tagee idinka duukeeyo
22. Amase mowdku igu soo dagee dabaqa laysaaro
23. Dadabtiyo aloolkaan ahaa dib u shalaantooda.

Gabaygaan waxaan ka fahmaynaa arrimo badan oo ay ka mid yihiin in aan lagu daa'imayn "Lagu waarayn" dunidaan qof walbaana uu ka

tagaayo dharaar cad ama habeen madow. Sidoo kalena waxaan ka fahmaynaa in aan lays raacin dunida aysanna wax natarayn geel iyo ari farabadan toona. Dhalinyarnimadeenana ka faa'idaysano intaynaan duqoobin ka hor. Sidoo kalena waxaa uu ina tusaalaynayaa abwaanku in aan iska celino shisheeyaha ku sooduula dalkeena iyo diinteena una muujino dhabar adayg iyo naxariis la'aan si ay inooga baqaan.

Ilaahay subxaana watacaalaa wuxuu yiri (Waxaad ku dhahdaa Nebi Allow camal sameeya Alle wuu idin arkayaa camalkiina). Aayadan Ilaahay wuxuu inagu boorinayaa shaqada, marka aad camal la timaado ayaad wax heshaa, markaasaad naftaada raali ka noqotaa. Maxaa yeelay waxaad sugaysaa jiritaankaaga, sugida jiritaankaaga, naftaaduna waxay ka mid tahay sugida shaqsiyadaada, waxaad arki qadarinta naftaada oo kor u kacday iyo adiga oo naftaada raali ka noqday, oo waxbadan xaqiijiyay, markaasay kalsoonida naftaada aad ku qabtaana kor u kacdaa.

Haddii Alle inagu booriyay waa in aan nafta barnaa shaqada lana nimaanaa waxkasta oo Alle ina faray una shaqaysanaa Adduun iyo aakhiro si aan liibaanteen adduunyo iyo teena danbe ugu liibaano.

Waxaa lagarabaa qofkii doonaya in uu ku noolaado nolol uu raali ku yahay in uu sabro, jihaadna ugalo nolosha iyo guusha waana tan dhabta ah oo laga rabo qofka doonaya in uu ku noolaado nolol sare.

Waa in aad go'aan qaadataa lana timaado dadaal waxaa hubaal ah in aad gaarayso meesha aad usocoto waase haddii aadan ka istaagin halganka nolosha. Waa in aad ahaataa mid yididiilo leh iyo aragti fog iyadaa lagu gaaraa nolosha dhabta ah.

Guushu waa mid aan sahlanayn loona maro wado adag. Guul daraduna waxaa loo maraa wado fudud waayo waa mid aan ku dhisnayn karti, rabitaan iyo awood. Haddii lagaa helo awood iyo rabitaan xaqiidii waxaad ugudbaysaa waddada ugu fiican ee loo maro guusha.

Dhulka Ilaahay inaga ayuu inoo abuuray, wuxuuna ina amray inaan ku dul socono, oo aan ku dul dhaqaaqno oo aan dushiisa qorshe ku samaysano, go'aankana kuqaadano, si aan wax u samaysano una fulino oo aan sifiican unoolaano.

Alle wuxuu inoo sakhiray dhulka iyo cirka iyo waxa ku dulnool waa in aan ka faa'idaysanaa fursadaa uu Alle ina siiyay anagoon dayacayn jaaniskaa iyo cilmiga uu Alle inaku galadaystay.

Abuu Cabaas C/laahi bin Cabaas Alle raali haka noqdee wuxuu yiri: Waxaan maalin raacay Nebiga "NNKH", wuxuuna igu yiri " Hoy wiilow waxaan ku barayaa kalimaad, 'Alle xifdi' (qaado amarkiisa) wuu ku xifdinayaaye, Alle xifdi hortaada ayaad ka heliye, haddii aad wax su'aalanayso Alle weydiiso, ogow haddii ummaddu u kulanto inay shay kugu anfacaan kuguma anficikaraan, wax Alle kuu qoray maahane, hadday u kulmaan inay shay kugu dhibaan

kuguma dhibi karaan wax Alle kuu qoray maahane, qalinkii waa laga qaaday waraaqihiina way qalaleen.

Ruwaayo kale ayaa aheyd, Alle xifdi waxaad ka heli hortaada, Alle xus xilliga barwaaqada wuxuu ku xusayaa xilliga dhibaatada, ogow wixii ku gefa ma'ahayn inay ku asiibi lahaayeen, wixii ku asiibana ma'ahayn inay ku gefi lahaayeen. Ogow gargaarku waa sabarka agtiisa, farajkuna waa kurbada agteeda, culayskana waa fudueydka agtiisa". (Muslim baa weriyay).

Xadiiskaan waxaan ka fahmaynaa in talaabo kasta oo aad uqaadayso noloshaada aad Alle talo saarato isagana aaminto si aad ugaadho barwaaqo iyo liibaan uu Alle raali ka yahay adna aad u hesho nolosha macaankeeda iyo in uu Alle kuu fududeeyo halganka aad ugu jirto naftaada in aad raali galiso.

CAQABADAHA GUUSHA KAA HOR ISTAAGA

Marka laga hadlaayo guul waxaa dabataal guul daro. Waxaan rabnaa in aan kala ogaano waa maxay guul, guul darese maxay tahay?

Guushu waa markii aad gaarto hadafkaagii iyo yoolkaagii kuu degsana waxaad hanatay guushii. Waxaana gacanta soogashatay shay qaaliya oo ah guul.

Guuldaro waa in aad ka miro dhalin waydo hadafkaagi iyo yoolkii kuu degsanaa. Sababtoo ah ma jiro ruux guulaysta mar walba ilaa uu la kulmo caqabado iyo mushkilaad kala duwan.

Inbadan waxaad maqashaa guul laakiin miyaad taqaan sida guusha loo gaaro iyo caqabadaha kaa hor imaan kara? Qof walba oo jecel in uu hanto guul waa in uu naf iyo maal ubaxshaa hanashada guusha si uu ugaaro.

Waxaa jira caqabado badan oo soo foodsaara guulaystaha. Waxaana ka mid ah:-

1. **Qorshe la'aan:** Qorshe la'aantu waxay ka mid tahay caqabadaha soo wajaha qofka. Maxaayeelay markii aad rabto in aad gaadho hadafkaaga iyo yoolkaaga waa in aad leedahay qorshe cad oo aad wax ku kala wado. Tusaale markii aad rabto in aad gasho imtixaan oo aad ku guulaysato, waa in aad leedahay jadwal.

Waxa uu kuu sahlayaa jadwalka in aad maarayso waqtiga, lix saacna aad seexato, lix saacna aad waxbaranayso, lix saacna aad gudanayso waa jibaadka Alle, lix saacna aad wax akhrido. Waxaa kuu fududaanaya in aad hesho libinta sababtoo ah waxaad haysataa qorshe cad in aad ku guulaysato natiijada imtixaanka.

Ogow markii aad ku talagasho in aad noqoto qofka kowaad ee guulaystaha ah waa in aad talada ku darsataa in uu jiro ruux adi tartan kula galaya oo masaafada aad jarto kula jaraya, inta aad hurudo waa uu soojeedaa, inta aad wax akhrinayso waa kula akhrinayaa, inta aad cibaadaysanayso waa uu kula cibaadaysanaya.

Kawaran ruuxaa kaa faa'idaystay, intii aad hurudayna waa uu dadaalayay akhris iyo qorid badan buu ku jiray. Intaad akhriska ku jirtayna waxa uu siijarayay socdaal ah in uu guulaysto oo kaa hormaro inta aadan gaadhin.

Soomaalidu waxay tiraahdaa **(Ninkii seexdaa sicii dibi dhal)** oo ay ulajeedaan qofkasta oo is dhigtaa waxa ku hareeraysan guul darada hadafkiisa, waana sababta dad badan oo dunida ku nooli ay u dhahaan waxaa nahaysta caqabado oo ma guulaysano si kastoo aan udadaalno. Taasna waxaa keenay waa qorshe la'aanta aad ka leedahay waxa aad qabaneyso oo dhan.

Markale waxay dheheeen saddex ma gaartid **(Ruux qorsho leh, ruux go'aan leh, ruux rabidtaan leh)**. Waxaan ka fahmaysaa qofku hadduu leeyahay qorshe cad, go'aan adag iyo rabitaan ka go'naansho ah waa adag tahay in aad si fudud ku gaarto. Sababtoo

ah adi ma lihid wax cad oo aad ku hanato yoolkaaga. Maahmaah ayaa ahayd **"Qowl iyo qorsheba waa lacadeeyaa"**. Haddii aadan lahyn qorshe meel ma gaartid.

Alle wuxuu yiri **(Haddii aad go'aan gaarto talo saaro Allaah, Allena waa jecelyahay kuwa talada saartee).** Marke waa in aan yeelana wax cad oo aan ku tartano.

Haddii ay taas dhiciwaydo waxaa adag in aad hanato guusha, sababtoo ah waxaa kaa maqan shey qaaliya oo ah tashkiilaadii aad gu gaari lahayd hamigaaga. Maah-maah baa ahayd **(Onkod xeeshiis buu dhacaa hadalna nuxurkiis).** Caqabada ugu weyn ee soo wajaha guul raadiyaha waa qorshe la'aan.

2. **Kibirka:** Qofka kibirka badan iyo qofka qoonsimaadka badan midna meel ma gaaraan. Haddii aad tahay ruux uu ku jiro kibir iyo iska sarayn, waxaa hubaal ah in aadan meel gaari karin.

Ragow kibirka waa lagu jabaa kaa hala ogaado, taas waxaan ka fahmaynaa in kibirka aan meelna lagu gaarayn, sikastoo aad uroorto ama aad u korto babac iyo buur waxaa adag in aad hesho ama aad gaarto guusha aad rabto. Ruuxu waxa uu kibrikaraa markii uu hadafkiisii iyo yoolkiisii hanto laakiin inta ka horaysa fadhi iyo kibirtoona guul laguma gaadho.

Soomaalidu waxay dhahdaa **(Fadhi iyo fuud yicibeed laysku waa)** oo ay ula jeedaan qofna si dhib yar uma hanto guusha iyo kama danbaysta darajada sare. Waa in aad umartaa dhib, waa in aad

usafartaa, usaamo layshaa, una soojeedaa xiliyada dadku hurdaan. Intaa haddii lagaa waayo dadaalkaagu waa hal bacaad lagu lisay oo kale.

Maah maah kale waxay ahayd **(Kibirku harkuu kaasaaraa hoosna kuguma simo)**, taas micnaheedu waa in aadan ahayn ruux kibir iyo isla wayni ku jirto sababtoo ah ma jiro ruux islaweyni iyo istustusnimo meel ku gaara balse in uu gaaro daaye waxa uu noqdaa ruux shalayto badan oo ka qoomameeya wixii soomaray.

Saddex waa isqabtaan **(Qof qosol badan iyo qof qoonsi badan, qof quud jecel iyo qof aan uquurin, qof qab weyn iyo qof aan u qabin).** Waxa ubadan oo ay dadku u guulaysan waayeen waa kibir iyo islaweyni aan xad lahayn taas ma keeni karto in aad hanato guul IWM.

Qofka marka uu guulaysto waxa uu gaaray yoolkiisii, wuxuuna xaqiijiyay mid ka mid ah qorshihii iyo waxa uu ku taamayay.

Haddaan sooqaato gabaygii uu tiriyay Abwaan Axmed Ismaaciil Diiriye oo ku magac dheeraa Qaasim, sanadku marka uu ahaa 1960-kii, kolkii gobanimada la helay, isaga oo cadan jooga waxa uu ku salaamayay una bishaaraynaayay geesiyaashii soomaaliyeed ee muddada dheer u soo halgamaayay gobanimada, gaar ahaan waxa uu ku xusayaa Sayid Maxamed C/dulle Xassan.

Wuxuu yiri:

1. Allow yaa darwiishkii farriin dabacsan gaarsiiya
2. Allow yaa dabaal deg iyo farax kala dul eedaama
3. Allow yaa dadkaagii yiraahdaa dowladnimo qaaday
4. Dhaaxuu u daakiray xaqoo naga dahsoonaaye
5. Haddaawado dadka u hiiliyiyo doogga soo baxaye
6. Allow yaa dalluuntiyo qabriga dib uga soo saara
7. Allow yaa dirkii dhoodi-meer doona faraciisa
8. Allow yaa darmaan fara taqaan duqa u heenseeya
9. Allow yaa duleedada taleex uga damaashaada
10. In dariiqadii nooshahoo dihine soo gaadhay
11. Oo uu dabkuu shiday rag kale dogobyo sii saaray
12. Allow yaa af lama daaliyo e daacad ugu sheega.

Abwaanku waxa uu sifeynaayay kana sheekaynaayay guushii lagaaray iyo ammaanta raggii soohoyiyay iyo raggii ka soo shaqeeyay muddada dheer u dagaalamaayay oo naf iyo maal u huray. Sidoo kalena waxaan gabaygaan ka fahmaynaa in marka aad gaadho guusha aad farxi karto balse inta ka horaysaa ay tahay wali reerku waa hayaan oo macaga dhigan.

Ruuxa waa in uusan ka dheeraan waajibaadka Alle uusan noqon ruux aan ku mahadin Allihii uumay oo gaarsiiyay guushaas. Guul darada ubadan waa Ilaawitaanka la ilaawo Alle cabsidiisa sababtoo ah markasta oo aad hanato hadafkaaga waa in aad u mahadnaqdo Allihii ku waa fajiyay guushaas.

3. Xaasidnimo: Qofka raba in uu gaadho yoolkiisa waa in uu maanka iyo maskaxda ku hayaa in uu san meelna gaarin ruux xaasid ah aan ogolayn libinta iyo guusha dadka kale.

Waxaad arkaysaa ruux leh ani waxaan rabaa in aan ka gun gaadho hadafkayga laakiin marabo in ay dadku ila gaaraan hadafkayga taas ma fiicna diiniyan iyo bini-aadanimo waayo ruuxna ma hanto guul isagoo xaasidnimo ku jirto.

Waa tii la yiri **(Ma liibaano xaasidka)**, qofka xaasidka ah waligii meel ma gaaro oo isagay ku noqotaa xaasidnimadiisa. Waxaa qofka aadanaha ah laga rabaa in uu la jeclaado walaalkii waxa uu la jecel yahay naftiisa. Sababtoo ah haddii aad adi keliya dhahdo waa in aan kaligay saas ahaadaa ma dhacayso in aad gaadho wadadii aad usocotay iyo yoolkaagii kuu degsanaa.

Maah maah ayaa ahayd **(Xaasid ma bulaalo)** oo loola jeedo qofka keligiis isku rabaha ah meel ma gaaro guulna ma uriyo.

Markale waa tii la lahaa **(Xaasid ma xayaado)** oo ah in marnaba talaabo la qaadi karin ilaa laga dheeraado waxkastoo qoonsi iyo kibir keeni kara. Taasna waxaa looga fadhiyaa qofkasta oo islaam ah waayo qofka islaamka ah Alle waxa uu siiyay nimco aysan haysan gaallada oo ah Iimaanka taasna waxaa looga fadhiyaa in aad ku shukrido dadka guulaha gaarayna ama kaa guulaystana aad umahadnaqdo si qalbi furan adoon la imaanayn xaasidnimo IWM.

Xaasid wax ma xukumo hadduu xukumana kuma bulaalo oo waa eedaa.

Xasadku waa xanuun aan laga xafaaroobin. Sababtoo ah qofba qofka uu san la jeclayn libinta qof kale aan la ahayn naftiisa ma ku najaxo. Waxa uu ka siiqaadaya xanuun iyo xiqdi dheeraada.

Abii Xamsata, Aanas Bin Maalik ahaa (Alle raali haka noqdee) adeegihii Rasuulkana (NNKH) ahaa waxaa laga weriyay : In Rasuulka (NNKH) yiri: (Axadkiin ma rumayn Alle ilaa uu la jeclaado walaalkiis muslimka ah waxa uu nafsaddiisa la jecel yahay). Waxaa weriyay (Bukhaari iyo Muslim).

Waxaan ka faa'idaysanaynaa in aan qofka islaamka ah la xaasidin una ogolaano libinta uu Allihii uumay ugartay. Haku waayin imaankaaga xasidnimo adoo isleh qof wax u dhin ama jar ka tuur.

8. **Wahsi (Caajis badan):** Haddii aad doonayso in aad gaadho hadafkaaga marna ha u ogolaan naftaada in ay caajisto oo habsan ku dhaco shaqadii aad qorshaysay.

Caqabadaha ugu weyn ee soo wajaha qofka jecel guulaha ama guud ahaan bini-aadamka waxaa ka mid ah waa caajiska, waxayna kuu horseedaa in aadan meelna gaarin bal aad ku hodmato. Ruuxa jecel in uu gaadho yoolkiisa marnaba ma aqbalo waxa ay naftiisa iyo sheydaan ba jecelyihiin.

Sheydaanku waxa uu ku saaraya hu' qoyan waxa uu ku leeyahay waxaan waa adag tahay ee ha isku daalin, way adag tahay ee nafta ha dhibin, waa xili hurdee seexo, waad xanuunsan tahee ha is dhibin, waad daalan tahee iska naso, indhahaa ku xanuunaye iska dhaaf, waqti mahayside ha islurin, way dhib badantahee haka lifin nafta, waa qabobe ha bixin, guulaysan mayside ha cadibin naftaada, waxaan ku anfici maayaane waqti haku lumin IWM.

Sheydaanku marna kuuma ogola wax guul ah oo balan iyo wacad waxa uu ku maray in uu bini-aadamka luminaayo. Ninka dhaarta ku maray in uu bohol iyo jahanama ka tuurayo ma aaminaysaa mise raacaysaa awaamiirtiisa uu ku faraayo, waa inoo nasiib daro in aan ku hodmano sheydaanka iyo hadalada uu nagu dhaho xiliyada aan gudanayno waajibaadkeena Alle iyo markastoo aan ku joogno in aan gaarno guusheena.

Ruuxa mu'minka ah ma ahan kan caajisa oo wahsiga badan, waa ruuxa aan aqbalin wahsi waayo caajisku iyo wahsigu waa camal sheydaan oo ninkaas sharwadaha ah ayaa hogaaminaya. Waxaa naloo ka baahan yahay in aan cashar ka barano dadkii hore ee guulaystay iyo dadkii hore ee guul daraystay . Waa tii la yiri **(Casho walba cashar baro aad caalim noqotide).**

Waa in aan baarno maxay ku guulaysteen? Maxay sameeyeen? Maxay naftooda udiideen? Maxay nebcaayeen? Maxayse jeclaayeen? Maxay aqbali jireen? Maxayse diidi jireen? Waa su'aalo ubaahan in laga jawaabo iyo turxaan bixin aan caadi ahayn.

Waa in uu yahay qofka guul raadiyaha ah qof iswaydiin kara su'aalo kasta, kana jawaabi kara.

9. **Kalsooni la'aan:** Kalsooni la'aantu waxay kuu horseedaysaa in aadan gaarin meelna waayo waxaad ba ku kalsoonayn naftaada iyo awoodaada.

Haddii aad shaki ka qabto in aad guulaysanayso waxaa hubaal ah in aadan gaadhayn guul sababtoo ah ma aqoonsanid naftaada iyo awood uu Alle ku siiyay. Haddii aad iska dhaadhiciso ma gaaraysid guusha, ma socon kartid garab la'aan, ma dhaqaaqi kartid wehel la'aan, ma noolaan kartid keligaa, wax ma baran kartid, waligaa ma gaaraysid waayo awoodaadi baad xaqirtay kumana kal soonid.

Kalsooni la'aan kal ma jabiso kurbana kaama saarto. Waa in aad tahay ruux leh go'aan ku kalsoon naftiisa aan cid kale wax uga daba fariisan.

Alle qur'aankiisa kariimka ah waxa uu ku yiri "Haddii aad go'aan gaarto talo saaro Allaah, Allena waa jecel yahay kuwa talada saartee".

Markale waa tii uu lahaa Alle sareeye (Ruuxii Alle ka baqa ee sabra, Ilaahay ma lumiyo dadka ajirka dadka wanaaga sameeya).

Qofka mu'minka ah ma ahan in uu noqdo kalsooni la'aan miyaad ka liidataa shimbirta subixii duusha iyadoo calool maran habeenkiina soonoqota iyadoo dheregsan. Su'aashu waa maya. Waxaa qofka laga rabaa in uu leeyahay go'aan adag oo uu ku meel maro.

Soomaalidu waxay dhahdaa **(Kartidaada kuu dhaanta kun adeeradaa dhaleene).** Waa in aad tahay ruux karti leh. Inta badan dadka waxay la guul daraystaan waa kalsooni xumo iyo awoodooda oo aan aaminsanayn.

Dadka bini-aadamka ah waa sida ay iska dhigaan. Qof walbaana wuxuu yahay isagu sida uu iska dhaadhiciyo. Dadka japaaneska ah waxay aaminsan yihiin in ay samayn karaan waxkasta, haddii uu qof wax sameeyana ay samayn karaan, haddii aan la samayna ay waajib ku tahay in ay sameeyaan.

Dadka carabta ah waxay aamin san yihiin in la samayn karo waxkasta oo la sameeyay sidoo kalena ay samayn karaan waxkasta oo qof sameeyay. Haddii aan la samayna aysan isku dayin.

Dadka soomaalidana waxay ku leeyihiin waan samayn karnaa, haddii la sameeyayna waan isku dayi karnaa oo waan awoodnaa. Haddii aan la samayna waxay ku leeyihiin sababteebaan u sameyn weyney.

Haddaba qofka waxaa lagarabaa in uu dhaho wax walba waan samayn karaa, waan awoodaa waana samaynayaa. Markii aad samayn waydana waa in aad dhahdaa sababtee baan usamayn waayay waxaas iyo waxaas.

6. Dhaqaalo dari: Qofka marka uu usodcaalo guul iyo in uu ka miro dhaliyo hadafkiisa waxaa inta badan soo mara caqabado aad u adag kuwaas oo lidi ku ah horu socodka.

Waxaa ka mida dhaqaalaha waana kan ugu muhiimsan ee lagu gaari karo wado kasta oo aad doonayso in aad gaarto. Tusaale, markii aad rabto in aad furato dukaan oo aadan haysan wax tacab ah oo aad ku bilawdo waa adag tahay in aad furto sababtoo ah ma aad awoodo.

Marka laga hadlaayo ganacsiga waxaa shardi ah in ay jiraan laba shay oo kala ah:

1. Rabitaan "doonis"
2. Awood "karti"

Waxaa dhacda marmar in aad jeceshahay in aad samayso dabakaaye ama bakhaar, laakiin ma awoodo in aad ku dhaqaaqdo ama aad fuliso arrintaa oo waxaa kaa maqan dhaqaalihii. Sidaa darteed ma samayn kartid in aad furto goob ganacsi.

Marna waxaad awood uleedahay in aad wax walba samayn karto, mashruuc kastana fulin karto laakiin aysan jirin wax rabitaan ah. Taas hadday dhacdo ma suuragalayso in uu guulaysto qorshahaas waayo waxaa maqan rabitaan.

Qofkasta oo haya fikrad hadduusan haysan wax dhaqaale ah uma suuragalayso in ay guul ka gaaraan hadafkooda iyo yoolka ay

tiigsanayaan. Dhaqaaluhu waa kan kala socodsiiya wax walba waana kan kuu fura wado kasta oo aad ubaahato.

Haddii aad go'aan ku gaarto in aad aado dayaxa oo aad haysato dhaqaale kugu filan ama kaaba badan waad uduuli kartaa waana dagi kartaa dayaxa oogadiisa. Sababtoo ah waxaa jira dad tagay oo ku tagay dayax gacmeedyo. Waxaana usuuragashay in ay tagaan waa dhaqaale IWM.

Haddaba qofka hadduusan haysan waa adag tahay in uu gaadho bartilmaameedka uu rabo. Waana caqabada ugu weyn ee soo wajaha dadka jecel in ay gaaraan yoolkooda.

Dad badan waxay ka cawdaan hanti yari taas oo keentay inay guul daraystaan sababtuna waa dhaqaali yarida.

Soomaalidu waxay dhahaan saddex dadkaa kugu naca **xilo la'aan, xoolo la'aan iyo xishood la'aan**. Haddii aadan xoolo haysan ma ahid ruux ka miro dhasha hadafkiisa ilaa qof mooye sabra, kuna dadaala in uu hanto ama ka miro dhaliya hadafkiisa.

7. Caafimaad darro: Sheyga ugu qaalisan ee uu haysto qofka waa caafimaadka. Haddii uu waayo caafimaad waxkasta oo noloshiisa la xiriira waa uu waayaya. Sababtoo ah ma jiro awood ama karti uu ku meelmariyo fikirkiisa saliimka ah .

Alle waxa uu inasiiyay oo dhan waxa u fiican waa caafimaadka, waa in aan ka miro dhalino hadafkeena si aan ugu guulaysano socdaalka nolosha ugu jirno.

Inta badan haddii aadan haysan caafimaad laakiin aad haysato waxkasta oo aad ubaahato waa adag tahay in aad gaarto yoolkaaga.

Maah-maah baa ahayd saddex dadka kugu naca **bukto badan, baahi badan iyo baryo badan.** Waxaan ka fahmaynaa in buktada badani ay tahay shey ka hor istaagaya in aad samayso waxkastoo aad go'aansato waayo jirkii caafimaad qaba baa guulaysta.

Waxaa nala karabaa in aan ka faa'idaysano caafimaadkayaga intaynaan xanuunsan ka hor, in aan ka faa'idaysano waqtigeena intaynaan mashquulin ka hor iyo in aan isxisaabino intaynaan nala xisaabin ka hor.

8. Talo la'aan: Guuldarada waxa keena waa talo la'aanta sababtoo ah talaabo ma qaadi kartid haddii aadan haysan talo iyo tusaale.

Dadka inta badan guul daraystaa waxa ka mid ah oo soo wajaha waa talo la'aanta waana lagu hodmaa in aad iska socoto talo la’aan.

Soomaalidu waxay dhahdaa **saddex baa dadka uliita matoshe, ma tashade iyo ma tashiishe.** Haddii talo lawaayo wax walba la' waa.

Waxa la yiri markii talo la helo ayaa tubta la tiigsada. Qofka raba in uu ku guulaysto noloshiisa waa in uu yahay ruux leh talo. Sidoo

kalena la tashado dadka khibrada u leh. Laakiin qofka aad la tashanayso waa in uu yahay ruux u saaxiib ah talada aan ahayn ruux xaasid ah.

Qofka xaasidka ah la lamatasho waayo waxa uu kaa tuurayaa god iyo meel aadan ka soowaaqsan waligaa.

Waxaa la yiri waxa saaxiibo ahaa laba wiil laakiin mid ayaa ahaa xaasid, waxay yimaadeen bad wayna ku mayrteen saa midkii aan xaasidka ahayn ayaa waxaa qaaday xiis, markaas ayuu qayliyay waxaa soo rooray kii xaasidka aha, wuxuuna ka soosaaray baddii waana soobad baadshay.

Markii banaanka loo soo baxay ayuu dhahay kii la soobad baadshay waad mahadsantahay maadaama aad isoo bad baadisay. Inta uu qoslay ayuu dhahay kuma soo saareene, maalin dhawaynto ayaa wadaad ka maqlay ruuxii baddu cunto waa ehlu jano. Marke waxaan arkay adoo naf ah oo baddu ku wadato waxaan is iri inta uusan dhiman ka gaar yuusan janadda galinee.

Waxaan ka fahmaynaa qofka xaasidka ah lala matashado lalamana saaxiibo sababtoo ah sidaa iyo si kadaran ayuu kuu galaya.

Inta badan dadku iskuma ogola libinta iyo guusha. Waxaana ku hortaagan in aad ka fiirsato ruuxa aad la tashanayso. Tusaale ahaan, waxaad go'aan ku gaartay in aad qorto buug, waxaadna u baahatay in aad hesho qof kaa caawiya oo ku siiya talo iyo tusaale si aad u raacdo una gaadho guusha.

Ruuxa aad utagaysaa waa in uu yahay qof horay usoo qoray buugaag ama qoraa ah waxaana la dhaha **(God ninkii galaa laga waraystaa)**. Oo qofka kaawaya aragsan waa lama huraan in aad la tashato.

Maah-maah soomaaliyeed ayaa ahayd **(Qofkii gu' kaaweyn il guruxeedna kaa weyn)** oo macneheedu yahay in qofka kaawaaya aragsan la tashato siddii aad u hanan lahayd guushaada ah qoridda buugga.

Dadka guulaystaa waa dadka badanaa la tashta dadka ka waaya aragsan sababtoo ah **kor waayeel waa wada indho**, waana lama huraan in aad xaqiijiso ka gun gaadhida hadafkaagii kuu dagsanaa.

Waxaa hadda ka hor meel daganaa oday, waxaana u imaan jiray dadka waxayna ka qaadan jireen talada. Waxaa soo aaday nin waxa uuna yimid meeshii uu daganaa. Ka dib waxa uu weydiistay in uu la taliyo markaas ayuu dhahay iikeen tulud aan ku siiyee talo. Waxa uu siiyay hal uu watay ka dibna inta uu ka gudoomay ayuu dhahay, **(Wax hubso)** oo iska aamusay.

Ninkii ayaa dhahay ila-tali suuyeen wax hubso mar labaad. Suuyeen ila-tali, odaygii inta uu eegay ninki ayuu dhahay wax hubso adeer.

Ninkii isaga oo yaaban ayuu tagay gurigii , hashiina laga qaatay waxa uu ku baxshayna uusan garanayn.

Waxa uu tagay gurigii xili saq dhexe ah, waxaa uu arkay guriga nin dhex hurda oo islaanta dhinac hurda, inta uu xanaaqay ayuu damcay in uu caloosha ablay ka gasho. Saa marka uu ula soobaxay tooraydii ayuu xasuustay hadalkii uu yiri odaygii ee ahaa **wax hubso**. Dib ayuu uga istaagay, waxa uu go'iisii dhigtay ardaaga. Subixii marka uu kacay ayuu ogaaday ninka uu dililahaa in uu ahaa sodogii.

Maah-maah soomaaliyeed ayaa ahayd **(wax wax ku siiya wax badan baa aragtaa wax wax kuu sheegana wax yar).**

Talada adaa ku nool ee iyadu kuguma noola. Ahow ruux mar walba talada gorfeeya teeda wanaagsanna qaata.

Ruux kasta oo guulaysta waxa uu ku tiirsan yahay talo, waana mid gorfeeya, ka dibna qaata teeda macquulka ah. Ruux kastoo guul daraystaa waa mid aan lahayn talo iyo gorfeeyn toona waana sababta dad badan ugu halaagsamaan wadooyinka guul darada.

10. **Goynta xariga Alle:** Haddii aad tahay ruux aan haysan xariga Alle, waxaad noqon ruux aan gaarin libinta iyo guusha teeda wanaagsan.

Mana noqonaysid ruux qorshihiisa ufulaan, taladuna waa kaa kala yaacaysaa. Sababtuna waa xariga Eebbe oo aad goysay. Alle wuxuu yuri **(Qofkii igooyaa anna waan goyn).**

Ruuxa aadanaha ah waxa uu dadnimo ku leeyahay markii uu guto waajibaadka Alle, lana yimaado wixii la faray waa hubaal in uu waxkasta uu ku hamiyo Alle ufududeeyo .

Dadka inta badan nolosha ku guul daraysta waxa ay jareen xarigii isku hayay iyaga iyo Allihii uumay. Haddaad rabto in aad gaarto yoolkaaga qabso xariga Eebbe, Alle kuma khasaarinayee.

Alle weyne wuxuu qur'aankisa ku yiri **(Ruuxii Ilaahay ka cabsada ee sabra, ilaahay ma dayaco dadka wanaaga sameeya ajarkooda).**

Alle ma ku dayacaayo haddii aad talo saarato oo aad ka cabsato isaga lana timaado wixii lagu faradyeelay.

11. Guul darada oo aadan cashar ka baran: Caqabada soo wajaha dadka waxa ugu weyn iyagoo aan ka baran cashar wixii soo maray oo dhan ama dadkii ku jabay wadadaan oo guul daraystay. Dadka guul daraysta waa kuwa aan ka leexan wadadii ay ku fashil meen kuwii iyaga ka horeeyay.

Waa in aad tahay ruux markasta ujooga guul balse aan ujoogin guul daro. Waayo guul daradu waxay kugu dharbaaxdaa dadka hortooda laakiin guushu waxay kugu dharbaaxdaa kelinimada

MAARAYNTA NOLOSHA IYO HOGAAMINTA HABOON

Waxay dad badan ku fashilmeen in ay maareeyaan socdaalka ay nolosha ugu jiraan. Waxaa qofka laga rabaa in uu leeyahay hididiilooyin iyo yool uu hiigsanaayo.

Tusaale marka aad rabto in aad gaadho Xidigaha waa in aad leedahay hadaf. Sidii aad ku gaari lahayd xidigaha, waana in aad samaysataa jaran jarooyin aad umarto socdaalka aad ugu jirto gaaritaanka aad hiigsanayso ee Xidigaha.

Haddii aad go'aankaas fuliso, kana miro dhaliso hadafkaaga, waxaa kuu soobaxaya maxsuul ah in aad gaarto xidigaha haddii ay dhici weydo waa in aad gaarto meel udhow. Qofka bini-aadamka ah waxaa laga rabaa in uu noloshiisa ka leeyahay mow qif adag iyo sida looga taxadaro hab dhaqanka bulshada iyo maaraynta waqtiga.

Dad badan waxay ku guuleysteen in ay hogaamiyaan naftooda iyagoo u haya hogaanka ay ku gaari karaan masiirkooda mustaqbal. Soomaalidu waxay **dhahdaa nimaan maanta ka talin waxa yaal biri kama taliyo waxa imaan doona**. Qofka aadanaha ah waxa uu masuul ka yahay naftiisa, ehelkiisa, dadkiisa, diintiisa, wadankiisa iyo guud ahaan dadka islaamka ah. Haddii uu ku guul daraysto taas waa in laga helaa qayb ka mid ah in uu xaqiijiyo khaasatan naftiisa sidii uu umaarayn lahaa.

Ruuxkasta waxaa saaran xil, waxa uu masuul ka yahay waxa uu gacanta ku hayo, waana la waydiin doona. Balse waxaan oran karaa

hogaaminta marka laga hadlaayo, waxaa loola jeedaa habkii aad hogaamiye ugu noqon lahayd naftaada iyo dhammaan bulshada kugu xeeran, sababtoo ah qof aan aqoon hogaaminta kuma guulaysan karo in uu ka gun gaaro aayatiinka noloshiisa iyo bulshada uu ku dhex nool yahay.

Qof walba oo ka dhaca nolosha waxa sababa waa fulitaan la'aanta qorshihiisi udegsanaa. Haddii aad maqasho hebel waa dhacay ama waa guul daraystay waxa ugu weyn ee soowajaha qofka aadanaha ah waa qorshe la'aan ama isagoo aan lahayn aragti fog iyo mustaq bal la'aan iyo isagoo aan udegsanayn hadaf uu ku gaaro aayaha guushiisa.

Waxaa eegtaan wiilkaan yar, waxa uu usoo maray noloshiisa iyo caqabadaha soo wajahay iyo heerkii uu ka gaaray noloshiisa iyo ka miro dhalinta yoolkiisii mustaqbal.

Waxa uu ku dhashay degmada Eyl ee gobolka nugaal, waxa uu ahaa ku ray yaraantiisii waxa uu joogi jiray baadiyaha ku dhow Eyl. Inankaan waxa uu ku soobarbaaray yaraantisa baadiyaha iyo magaalada Eyl. Kadib waxa uu u soowareegay magaalada Garoowe.

Waxa uu bilaabay dugsiga qur'aanka ka riimka ah, waxa uu gaaray heer aad u fiican. Waxa uu ahaa shakhsi aad u fahmad badan. Waxa uu jeclaa in uu waxbarto kana miro dhaliyo hadafkiisa iyo yoolka udegsana.

Wiilkaan yar waxa uu jeclaa in uu galo iskuul kuna biiro ardada isku ayniga yihiin si uu ugaaro waxa uu hiigsanaayo.

Wiilka yar waxa uu ku guul daraytay in uu galo iskuulka sababta oo ah waaridkiis oo aan ahayn dad fahansan aqoonta iyo muhiimada ay leedahay. Balse waaridkiis waxa ay inbadan isku dayeen in ay geeyaan tuulooyinka iyo miyiga. Waxaa uu inbadan diiday in la geeyo tuulo iyo baadiyaha, laakiin nasiib daro waxa uu ku guuldaraystay in uu gaaro hadafkiisa ah in uu dhigto iskuulka waxbarashadiisana siiwato.

Asii wiilkaan ahaa inan yar oo aan ismaamuli karin, hadafkiisana kamiro dhalin karin. Waxa ay sababtay in waalidkiis ay ka xeeyaan, ayna geeyaan baadiyaha iyo tuulooyin.

Waxa uu nacay joogitaanka tuulooyinka iyo baadiyaha inbadan waxa uu isku dayay in uu safar usoogalo magaalooyinka waaweyn laakiin waa lacelin jiray oo waxa loo diidi jiray in uu soo aado magaalooyinka. Waxay waaridkiisa uga biqi jireen in uu ku biiro ciyaalada magaalada qasa iyo kuwa habeenkii dadka furta ee gaangiska ah. Maadaama uusan lahayn caqli ku filan iyo waayo aragnimo uu naftiisa ku xakameeyo.

Taas waxa ay keentay in uu ku abaado baadiyaha, waxa uuna la qabsaday nolosha tuulooyinka iyo baadiyaha. Laakiin nasiib wanaag waaridkiisa waxa ay isku dayeen in ay macalin u qabtaan si uu ubarto qur'aanka kariimka ah.

Waxaa loo qabtay macalin, isaga iyo caruur ka yar yar balse wiilkaan yar waxa uu ahaa inan fahmad badan oo ku kalsoon naftiisa iyo in uu meel walba ku guulaysan karo.

Waxa uu guul weyn ka gaaray in uu barto qur'aanka kariimka ah, iyo barashada diinta islaamka. Sababtoo ah waxa uu wiilka ka soojeedaa reero asal ahaan diinta ku xeel dheer ama lagu tuhmo in ay yihiin reero xagga diinta looga dambeeyo.

Waxa uu bilaabay wiilka yar in uu dhalinta ay is le'egyihiin uu baro qur'aanka kariimka ah iyo micnihiisa. Waxa uu aad ujeclaa in uu noqdo macalin sifiican wax uga yaqaan xagga diinta iyo macnihiisa. Sidoo kalena waxa uu jeclaa in uu siiwato aqoontiisa ilaa uu ka gaaro heer uu umadda unoqdo indho.

Laakiin ma aysan dhicin in uu siiwato tafsiirkiisa iyo barashada diinta islaamka guud ahaan. Waxa u badan oo taas keentayna waxay ahayd waalidka oo aan aqoon durugsan ulahayn cilmiga kale waxayna aamin sanaayeen in wax walba ay tahay keliya qur'aanka oo la barto bes.

Wiilka yar taas uma cuntamin waaridkiisna ma aysan garan in uu wiilku hadaf iyo yool leeyahay. Waxa uu in badan isku dayay in uu barto farta soomaaliga sida wax loogu qoro nasiib wanaag inanka ayaa ku wanaagsanaa xagga qorida farta carabiga ah maadaama uu bartay qur'aanka iyo yeeriska taas waxay u fududaysay in uu si sahlan u barto farta soomaaliga ah.

Waxa uu bartay sida loo qoro magaciisa, balse waa ku guulaystay isagoo aan macalin wax uyeerin in uu qoro farta soomaaliga ah. Maadaama uu bartay sida wax loo qoro waxna loo akhriyo waxa uu isku dayay in uu siiwato dadaalka uu ugu jiro barashada soomaaliga iyo sida loo qoro. Nasiib daro ma uusan helin qof caawiya kana caawiya sida loo kobciyo qoraalka iyo sida wax loo akhriyo.

Wiilka aabbihiis, waxa uu ahaa nin ka shaqaysta badda, xirfad aad u dheerna oo la xirirta badda wuu lahaa. Aabbihii maadaama uu ka shaqaysan jiray badda iyo magaalooyinka waaweyn sida Boosaaso iyo Garoowe, waxa uu ahaa nin wax akhriya waxna qora aabbihiis.

Waxa uu aabbihiis lahaa ganacsi shakhsiyeed, maadaama uu lahaa ganacsi waxa uu qorijiray deymaha iyo kharashaadka baxa iyo lacagaha soo xarooda iyo dadka magac yadooda. Taas wiilka yar waxay u hayd guul aan la soo koobi karin waayo waxa uu akhriyi jiray qoraalkaa maalin walba. Waxa uu awood uyeeshay in uu noqdo qof wax walba qorikara waxkastana akhriyi kara.

Wiilkaan waxaa haleelay xanuun, midkaas oo sababay in looqaado magaalooyinka laakiin waxa uu isku dayay in uu joogo magaalada. Nasiib daro waxa u diiday aabbihii in uu joogo magaalada. Ka dib waxa loo qaaday baadiyaha, waxa uu joogay muddo halkaas.

Wiilka yar waxa soo gaaray niyad jab, waxayna sababtay in uu waxkasta ilaawo. Xataa in uu ilaawo qur'aankii uu bartay iyo micnihiisii. Waxaa soo wajahay nolol adag maadaama uusan raali

ka ahayn in uu ku noolaado baadiyaha sababtuna tahay aqoon la'aanta.

Waxa uu aaminsana inanka yar in aqoontu tahay sheyga keliya ee anfacaya qofka iyo bulshada oo dhan. Waxa uu inbadan ka maqlaa idaacadaha waxaa qalin jabshay intaas arday leeg. Waxa uu jeclaystay in uu ka mid noqdo dadkaa qalin jabshay inkastoo uusan fahansanayn aqoonta la sheegayo. Maxaa yeelay ma uusan arag ruux la dhahaayo hebel waa aqoon yahan laakiin waxa uu garowsanaa in ay ka maqan tahay wax weyn oo noloshiisa ka mid ah.

Waxa uu arki jiray doonyaha badda gooshaya, saxiimadaha iyo foolfayaasha yar yar oo oradka dhaadheer. Waxaa ka siiyaabshay maraakiibta waaweyn ee badda dul sabaynaya oo ka dhisan yihiin guryaha ayna ku nool yihiin dad isaga la mid ah.

Waxaa kaloo ka yaabshay waa magaalo soconaysa oo meeshii ay rabto maraysa. Waxaa wada dad kala jaad ah oo aan isku afku hadlayn. Waxa uu la yaabay siday isku fahmayaan iyo sida ay kuwada xiriirayaan.

Waxaa mucjiso la noqotay sida loo sameeyay iyo qaabka loowado iyo sida ay shidaal la'aan usocon karin. Waxay la noqotay wax filan waa ah.

Waxa uu ka fakaray sidii loo sameeyay iyo sida loogu dulnool yahay maraakiibta iska saaran badda. Waxa uu is weydiin jiray

xaggee bay ka helaan cunnada ay cunayaan maadaama ay badda iska saaran yihiin. Waxa kaloo uu isweydiiyay xaggee bay biyo ka helaan dadkaan? Miyaysan haraadin? Iyo meesha ay u xaajo tagaan? Waxaa maskaxdiisa ka guuxi jirtay haddii ay xanuun sadaan xaggee dhakhtar u aadayaan? Xaggee dawo ka helayaan?

Waxa uu fakaraba waxa uu go'aan saday in ay waxaan sal u tahay aqoon, sidoo kalena ay jirto farsamo waxaan lagu wado. Waxa uu xaqiiqsaday in noloshu sidaas oo kale u baahan tahay aqoon iyo farsamo wax lagu wado.

Waxa uu utagay Aabbihii waxa uu ku yiri:

Wiilkii yara: Aabbe sidee loo sameeyay markab ka?

Odayga: Wiilkaygiyow waxaa sameeyay warshad.

Wiilkii yaraa: Aabbe warshadu yaa sameeyay?

Odayga: Wiilkaygiyow waxa sameeyay rag khuburo ah oo aqoon u leh.

Wiilkii yaraa: Aabbe raggaan maxaa u sahla in ay sameeyaan warshad, warshaduna ay samayso markab?

Odaygii: Wiilkaygiyow raggu waxa ay barteen aqoonta, waxayna ubaxsheen in ay waxbartaan waqti, juhdina ku baxsheen in ay ka sal

gaaraan. Taasna waxay usahashay in ay sameeyaan maraakiibta aad aragtay, doonyaha, foolfayaasha, guryaha, diyaaradaha iwm.

Wiilkii yaraa: Aabbe maxaa sahlay in ay doonyaha, maraakiibta, gawaarida iska socdaan?

Odaygii: Wiilkaygiyow waxa u sahlaya oo fure u ah waa shidaal, shidaalkuna waa naafto ama baasiin waxa ayna taas suuragal ka dhigaysaa in markabka uu socdo isagoo isaga gooshaya qaarad ka qaarad, wadan ka wadan iwm.

Wiilkii yaraa: Aabbe dadka sidee ugu nool yihiin maraakiibta dushooda? Xageese ka helaan cunnada ay cunayaan? Haddii ay xanuun sadaan xaggee dhakhtar ka helaan? Xaggeese dawo ka helaan? Biyose yaa siiya?

Odaygii: Aabbe waxa ay ku noolol yihiin nolosha dadka ay ku nool yihiin, waxay haystaan cunnaddi, biyihii, daawadi, dhakhtaraddii, guryihii, dharkoodi, matoorki biyaha umacaanaynaayay, makiinadii ay cunnada ku karsanaayeen, qalabkii ay kula soobixi lahaayeen libaaxa badda, kaambaha "aargoosato", kaluunka, dahabka, dheemanka, canbarka, dhammaan khayraadka badda laga helo oo dhan.

Wiilkii yaraa: Aabbe diyaarada sidee bay hawada ku gashaa? Yaase wada, mase lagu nool yahay?

Odaygii: Wiilkaygiyow waxaa la dhaho diyaarad sida markabka uu badda ugu dulsocdo ayuu isna ugu dulsocdaa hawada, inta uu markabku ubaahan yahay ayuu isna ubaahan yahay, sida loogu nool yahay markabka ayaa iyadana loogu nool yahay diyaarada. Waana waxa dadku sameeyaan sheyga keliya oo ugu dheereeya. Waxa uu isaga gudbaa qaarado saacado iyo maalmo kooban. Waxa ay sahashaa meel markabku isaga socon lahaa maalmo iyo bilo in ay saacado kooban isaga gooshto.

Wiilkii yara: Aabbe ani ma samayn karaa diyaaradaas oo kale.

Odaygii: Wiilkaygiyow waxay kaaga baahan tahay in aad barato aqoonta, makaanikada, birbir iyo bool bool ubarato , luuqada barato, sida loo sameeyo barato, sida loo wado barato, waxayna kugu qaadanaysaa intaas nus qarni. Laakiin waad samayn kartaa ileen iyadaba dad baa sameeyay.

Wiilkii yaraa: Oo aabbe ma bartaa aqoontaa si aan u sameeyo diyaarad?

Odaygii: Wiilkaygiyow iska samee ma ahan, aqoona micno maleh, waxaa ka wanaagsan in aad barato badda iyo duunyada iyadaa ah sheyga keliya oo aan ku faano hadaanahay soomaali. Anagu aqoon umalihin waxaan. Inta badan waxa sameeya gaalada iyagaana ujeedooyin ka leh ee ina kadaa aabbe waxaas yaanan mar danbe kaa maqale.

Wiilkii yaraa: Ayaa la soobooday aabbe anna aan sameeyo diyaarada ee igee meesha lagu barto?

Odaygii: Aabbe waxaas haku mashquulin, wadanka lagu sameeyo soomaali ma joogto, waxaa jooga dadkale oo aynaan af aqoon.

Wiilkii yaraa: Aabbe dadkaan kala midabka ah yaa bara luuqadaha? Sidee isku fahmaan?

Odaygii: Wiilkaygiyow waxaan waa cilmi labarto, ma ahan iska baro, waxay u baahan tahay xeelad iyo maamul laakiin adi waad yartahay walina ma aadan qaan gaarin. Waxaadna baratay qur'aanka kariimka ah. Wax ka fiican oo la barto ma jiraan.

Wiilkii yaraa: Aabbee waa sax wax ka fiican ma jiraan in la barto qur'aanka kariimka ah iyo tafsiirkiisa laakiin haddii kawaran aan xanuun sado ama dhaawac isoo gaaro sidee isku dawayn ?

Odaygii: Waxaa laguu gayn dhakhtar, isagaa ku dawayn?

Wiilki yaraa: Aaabbe dhakhtarku sidee u bartay in la daweeyo dadka?

Odaygii: Waxaa uu galay iskuul, kadibna jaamacad, ka dibna waxa uu doortay ama door biday in uu daraaseeyo caafimaadka. Markii uu bartay barashada caafimaadka iyo sida dadka loo daweeyo, waxa uu bilaabay in uu cilmigii uu bartay uga faa'ideeyo dadkiisa.

Wiilkii yara: Oo aabbe haddii uu ninkaasba bartay maxaa ii diiday in aan barto?

Odaygii: Wiilkaygiyow waxaas oo kale waqti laguma lumiyo, haddii aad magaalo aado yaa haynaya reerka? Ma cid kale oo haysa buu leeyahay?

Wiilkii yaraa: Aabbe waxa jira dad badan oo iga waawen iyagaa haynaya aabbe, anna waxbaa baran.

Odaygii: Waxaas ma kaa yeeelaayo, reerka ka tagi maysid waad joogaysaa. Ani saw kuma dhalin warkayga maqal mardanbe yaanan hadalkaa kaa maqal.

Wiilkii yaraa: Waxaa soogaaray niyad jab, waxa uu aad uga xumaaday hadalka uu aabihiis yiri, waxa uu dhahay aabbe ani haddii aan waxbarto saw dalkayga iyo dadkayga ugu adeegi maayo?

Odaygii: Wiilkaygiyow u adeeg reerkiina oo haysta xoolihiina iyagaa idiin ah hanti aad ku faantaane.

Wiilkii yaraa: Aabbe xooluhu way dhammaan karaan laakiin aqoontu ma dhammaato.

Odaygii: Aabbe waxaas waa been ani saw kaama weynin, nin gu' kaaweyna il guruxeed kaa weyn, wiilkaygiyow ma maqali waxaan ku dhahay.

Wiilkii yaraa: Inta uu yare murugooday ayuu dhahay haye aabbe siddii kheyr Allaan ka barine. Laakiin ani waa iga balan in aan mar un waxbarto dadkayga, diintayda iyo dalkayga ugu adeegi doono insha Allaah.

Inankii waxa uu qabsaday dhafoorada, murugo ayuu dareemay, waxa uu maskaxdiisa ka dhaadhiciyay in uu mar un cilmiga barto si uu bulshada uga faa'iideeyo. Nasiib daro ma uusan helin garab iyo gaashaan uu ku socdo kuna taagtaagsado, asii uu aaminsanaa in uu gaari doono hadafkiisa.

Waxa uu damcay in uu qabto meel magaalo ah si' uu halkaas wax ugu barto diini iyo maadiba. Laakiin waa uu ku guul daraystay in uu meel qabto markuu damco in uu dhaqaaqoba waa la qabtaa, taasna waxa keenay wiilka oo ahaa inan aad u da'yar aan lahayn caqli uu isku maareeyo aan ka ahayn waxbaro un. Waxaa uu ahaa mid ka baqa bahalada maadaama uusan ahayn kuray weyn.

Galab ayuu yimid meel bad ah, waxa uu fariistay raasiga dhagax badu garaacayso oo mowjaduhu ku soojabayaan. Waa uu ku dul fakaray waxa uu layaabay sida ay mowjaddu u dhacayso, biyuhu isku daba marayaan, noole yar yar oo ku dhex nool badda gudaheeda waxaas oo dhan ayuu iska daawaday ka dib ayuu dhahay:-
Allahayow adduunyadu
Ninkii doon doon is yiraahda
Isagoon hadaf lahayn
Hididiiliyo hal abuur lahayn

Awaamiir cad lahayn
Awood iyo tacab lahayn
Xeelad iyo aqoon lahayn
Noloshiisa in ay halis gashaa
Talaabuu u jirsadaa.

Muddo markuu cabaar fadhiyay ayuu kacay isagoo leh noolahaa yaryarka ah waxa ay maareeyaan noloshooda iyagoo iska ilaalinaya nooleyaal ka waaweyn kana awood badan. Iskuna dayaan in ay cunaan balse tabartiisa iyo taagtiisa inta uu adeegsado isaga carara.

Waxa uu hoosta ka xariiqay in uu la yimaado go'aano iyo hididiilooyin cusub isagoo kaa shanaya talasaarashada Alle iyo xiribtiisa uu Alle ugu deeqay. Waxa uu soo aaday dhanka iyo xaafadii waxa uu tagay gurigii, isagoo dhuumanaya, nasiib wanaag cidna ma arag, guriguu galay ka dibna waxa uu la soobaxay dharkiisii, isagoo la dareemin jidka ayuu laba ka dhigay.

Wiilka yar ma yaqaan meesha uu usocdo halka ay ka jirto iyo barta loo maro. Waxa uu socdaba ugu danbayn dad ayaa qabtay oo gartay inanka inuu safar yahay, ka dibna si xeeladaysan ayay ugu soocesheen gurigiisa maadama uusan dalka kala aqoon ilma yarna uu ahaa.

Waxa uu in badan ku jiray xaalad adag iyo welwel iyo walbahaar, noloshii ayuu nacay isagoo hiifay dadka la noolaa oo dhan. Laakiin nin qoyani biyo iskama dhowro waxa uu ku jiraa bad weyn murugo ah balse waxa uu talo saartay Allihii uumay.

Muddo kadib waxa u suuro gashay in uu yimaado magaalada isagoo loo keenay xaalad caafimaad. Nasiib wanaag waxa uu bilaabay in uu waxbarto Aabihiisna waxa uu ka codsaday in uu waxbarasho galaayo.

Inkastoo uu ka diiday markii hore, ugu dambayntii inankii waxa uu ku adkaystay in uu waxbarto. Hadal dheer ka dib, inankii waxaa loo ogolaaday in uu waxbarto maadaama uu in badan ku fakaraayay.

Wiilkii waxa uu yiri isagoo u mahadnaqaya Allihii urumeeyay riyadiisii:

Daa'inow Allahayow
Dunida kii abuurow
Duunyadiina soo raacshow
Diin iyo awaamiirna
Dadkuna ay ku dhaqmaan
Ruuxii darajadaa hela
Waakan daa'inkii mahadiya
Qofkii diinta bartee
Ku dara maadigiyo cilmiga
Dayaxa in uu dego
Daah igama saarnee
Allahayow guul dariyo
Iga daah hadimada
Kii dalkiisa anfaca
Diintiisa kor yeela

Dadkiisa wanaaja
Qalinkiisa ku difaaca
Xaqa u dirira
Dulmiga diida
Jahliga la dirira
Aqoonta u degdega
Daa'inow iga mid yeel

Markii uu ducaystay ayuu go'aansaday in uu la yimaado xeelad cusub oo uu ku maareeyo noloshiisa iyo sida uu wax ku baran lahaa. Maanta waxa uu haystaa jaanis uu asaagiis kula tartamo aqoonta, wanaaga iyo waxkasta oo horumar ah.

Waxaa uu haystaa waqti uu ku maareeyo noloshiisa geedi socodka ah, sidoo kalena waxa aan qorshaha ka maqnayn taageerada uu heli karo maadaama uu safar ugalaayo in uu barto cilmiga, loona baahan yahay dhaqaale iyo cid taageerta.

Waxa uu bilaabay in uu waxbarto, dadaal dheer ka dib waxa uu magaalada Boosaaso ka galay waxbarashada. Waxa uu ka soo wareegay magalada Boosaaso isagoo dugsi hoose ah. Waxa uu yimid magaalada Garoowe, halkaas ayuu ka siiwaday waxbarashadii dhexe iyo sareba.

Balse waxa la soodarsay inta uu kuguda jiray waxbarashadiisa nolol adag. Waxa uu quutal daruurigiisa kula soo bixijiray si adag, waxa uu galay waardiye. Habeenkii waxa uu waardiye ka ahaa meherad,

galabtiina waxa uu gadi jiray meherad, galinka horena waxa uu aadi jiray waxbarashada.

Xili ay ku beeg nayd 2011, waxa Inanka soogaaray dhaawac dhanka madaxa ah, ayna ku dhufteen tuugo aan haybtooda la aqoon isagoo ku jira waardiye, gudanayana shaqadiisii loo igmaday.

Waxa uu ahaa inanka wiil Alle ka cabsi badan, kuna dheereeya xagga diinta, waxa uu ahaa mid ilaasha shanta salaadood oo faralka ah iyo sunooyinkooda. Saqda dhexe habeenkii waxa uu u kici jiray salaatul laylka, waxa uu ahaa mid barya Allihiis kuna xiran markasta.

Habeen habeenada ka mid ah ayuu soojeed ku soodaahay isagoo aad ugu dheeraaday akhris buuggaag kala duwan akhrintooda maadaama uu ahaa wiil aad ujecel akhriska.

Waxa dhacday in uu gam'ay isagoo dul fadhiya kursigiisii akhriska. Waxa uu kacay salaadii subax oo lagu jiro, masaajidda qaarna laga baxay qaybna lagu jiro.

Nasiib daro subaxaas waxaa dhacaayay qabow aad udaran oo laamiga dad ma aysan marayn luuqyaduna way furnaayeen, tuugtuna waxay ku jireen jaanis gaad iyo xeelado cusub si ay ugaadaan dadka meheradaha ka soo baxaya iyo kuwa dagan oo suuqa u jarmaado ah.

Inta badan inankaan waxa uu kici jiray xili hore salaada subax isagoo banaanka hore qolka uu jiifo ku wasaysta, laakiin subaxaas waxa ka cadaatay salaadi wuxuuna ka dib dhacay xiligii uu kici jiray.

Isagoo lamoodo qof argagaxsan ayuu sare kacay oo caagad banaanka ula baxay si uu uweeso qaato. Waxa uu furay albaabka guriga, mana wada balaqin balse waxa uu isku dayay in uu baxo isagoo gacanna ku haysta caagad gacanna ku haysta albaabka ayuu damcay bax.

Waa meel ay wax ka jiraane waxa albaabka ku lamaan niman tuugo ah oo wata baangado iwm. Waxa ay isku diyaarsheen in ay qudha ka jaraan kuraygaan yar ka dibna dhacaan meesha waxa yaal. Balse inanku belo bowdka kama filan waxa uu islahaa salaada ka gaar. Madaxa ayuu la soobaxay markii uu keenay fooda hore ayay qabad siiyeen bir asii uusan garanayn waxa ay tahay ma faasbaa mise baangad mise wax kale. Waxay kaga dhufteen Xiska si xoog leh.

Wiilkii yaraa waa diyaamay waxaana ka luntay jihaddi, isagoo wareersan laakiin aan garanayn meesha looga yimid iyo sida ay wax ugaareentoona ayaa dhulka ku dhacay. Nasiib wanaag waxaa dhacday in tuugtii ay carareen ayna umaleeyeen in uusan wiilku waxba gaarin uuna doontay qori iwm.

Meeshiiba waa ka carareen iyagoo ka baqaya in la arko ama la qabto maadaama ay ahayd aroortii. Hadday ogaan lahaayeen in wiilku dhacay ayna la heleen nabar halis ah. Waxa usuuro gali lahayd in ay

qudha ka siijaraan oo dabada iska raacshaan laakiin tiisaan dhammaan oo caysh baa udhinnaa.

Wiilkii waxa uu kala garan waayay in uu nabar ku dhacay iyo in uu riyo ku jiro oo waxba kala saari waayay. Nasiib wanaag waxa uu wacay nambar isagoo ku yiri hebel waxa i haleelay jug madaxa ah waxna waan kala garan la' ahay ee iga soogaar. Cabaar ka dib waxaa sooduulay dhiig tiro badan ilaa ugu dambeyn uu dhulka ku dhacay oo miyir beelay. Waxa uu galay koomo ilaa muddo dhowr iyo labaatan saac ah.

Waxaa la geeyay isbitaal oo loola cararay si dhiig joojin loogu sameeyo sidoo kalana loo tolo dhaawaca soogaaray kuraygaan. Waxaa la tolay madaxii, waxaana la siiyay daawooyin laakiin wiilka waxa ka luntay xusuustii dheerayd oo waxba waa uu kala garan waayay.

Muddo Saddex bilood ah ayuu ku jiray haad iyo waraf, waxa uu ilaaway magaciisii iska dhaaf wax kale. Sidoo kale waxa ka ma saxmay wixii uu soo bartay oo dhan.

Waxay xaaladi sidaa ahaataba waxa uu helay xooggaa caafimaad ah, xusuusti ayaa usoonoqotay asii uusan ahayn sidii hore looga bartay. Wiilku waxa uu aad ujeclaa akhriska waana lagu kuunyi jiray dhankaas balse hadda ay isdaayeen. Sababtana waa dhaawaca soogaray awgiis.

Markii uu helay xusuusta ayuu dib ubilaabay waxbarashadii isagoo ka bilaabay meel hoose, wuxuuna galay macaahid iyo barayfado si uu udhiso heerkiisa aqooneed. Wuxuuna ahaa xiligaa fasalka sagaalaad oo waxa uu ugud baayay fasalka tobnaad. Dadaal dheer iyo dhib badan ka dib waxa uu socdaal ugalay sidii uu ugaari lahaa riwaayadiisii hore.

Waxaa soo wajahay xaalad caafimaad oo liidata, waxa uu dhaawicii madaxa ka gaaray ku noqday Neerfe iyo dhiikar.

Waxa uu qaban waayay oo ku adkaatay in uu wax akhriyo, sidoo kalena waxaa dhibtay cimilada gobolka oo aad u kululayd. Waxaa uu ku sigtay in uu isaga haro waxbarashada sababtoo ah waxaa dhib ku noqotay in uu soo xadiro xiisadaha iyo guud ahaan imaatinka iskuulka. Laakiin waxa uu muujiyay dulqaad, xilkasnimo sidoo kalena dhabar adayg uu u adaygay waxbarashada iyo nolol maalmeedkiisa.

Wiilkaan ayaa ahaa inan dabci adag oo waxa uu aaminsanaa in uu gacantiisa maalo, isagu isdabiro cidna uusan waxba waydiin. Go'aankaas adag uu qaatay waxay keentay in uu wax walba isku koobo, noloshiina ay ku adkaato.

Waxaa suurawday in uu saddexda waqti uu wax cuno hal xili ama uusanba waxba cunin. Muddo ayuu sidaa ku jiray, waagii danbese habeenkii ayuu qadi jiray sababtoo ah kharashka uu qaato ayaa ahayd mid yar oo aan ku filnayn.

Waxaana sugaayay fiiga iskuulka, macaahidda uu dhigan jiray, bareefado, sidoo kalena koobiyadii iwm. Laakin waxa uu ahaa mid aan laga dareemin in uu qaday habeeno ama habeenkaa seexday isagoo aan afkiisa wax saarin. Wiilkaan ayaa ahaa mid aamin ah, waxaa dhici jirtay in loo dhiibo 100,000 oo doolar habeenkaasna uu ku seexdo gaajo. Balse waxa uu aaminsanaa in wax walba ay noqon doonaan hagaag, loona baahan yahay in uu dhabar adaygo si uu uga gudbo marxaladaas adag.

Waxa ku adkaatay in uu wado iskuulka, xaaladiisa caafimaad awgeed, balse waxa dhici jirtay in uu xiisadaha hore qaato kuwa dambena ka tago. Nasiib wanaag kuma liidan xagga waxbarashada oo waa ku fiicnaa daraja sarena waa keeni jiray. Waxa uu saa ku jiraba waxaa la soo gaaray fasalkii ugu dambeeyay ee iskuulka, xaaladiisii caafimaadna waaba ka soodartay oo maalinba maalinta ka dambaysa waxa uu galaa xaalad xun, waxayna keentay in uu naco iskuulka.

Ragba waa ku raqeed, waxa uu muujiyay kelyo adayg, wuxuuna naftiisa ka dhaadhac shay in uu guulaysan doono mar un. Balse isaga looga baahan yahay **siddii xeerona loo xagan lahaa ilkona unabad gali lahaayeen.**

Waxa uu ku guulaystay in uu galo imtixaankii shahaadiga ahaa ee dugsiga sare, wuxuuna ku baasay darajada **A**. Taas oo ay dad badan la yaabeen inankii aan waxba akhrin jirin haddana iskuulka imaan jirin sidoo kalena xanuunsanaa in uu si dhibyar ku helo daraja sare.

Waxa uu umahad naqay Allihiis u suuro gashay in uu ka gudbo marxaladii adkayd ee waxbarashadii dugsiga sare.

Waxaa u bilaabatay waa cusub, wuxuuna maanta ugud bay heerkii jaamacada, loogana baahan yahay in uu la yimaado xeelado cusub oo uu ku maareeyo noloshiisa iyo waxbarashadiisa jaamacadeed.

Muddo waxa uu ka fakaraayay sidii uu isaga bixin lahaa fiiga jaamacadda oo ka duwan kii dugsiga sare, su'aalo badan uu waydiiyo naftiisa ugu dambayn waxa uu hoosta ka xariiqay in uu jaamacadda dhigto Allihiisna uu ku xirnaado, talana saarto isaga.

Maalmo ka dib waxaa uu mid ka mid ah warbaahinaha ka maqlay in jaamacadaha mid ka mid ah ay xayaysiinayso kuliyad, qofkii helana uu bilaash ku dhiganaayo. Waxa uu hoosta ka xariiqay in uu galo imtixaan kaas waana ku guulaystay in uu ka mid noqdo ardada minxada ku dhiganaysa.

Waxa uu ku showray habeen habeenada ka mid ah in uu bulshada wax ugatago wax un Alle haka dhigee, nasiib wanaag waxa uu hoosta ka xariiqay in uu qoro qormooyin ku saabsan arrimaha bulshada.

Waxaana ku xirmay boggiisa uu ku leeyahay **facebooka** bulsho badan, isagoo usoo ban dhigi jiray sheekooyin ka turjumaya dhinacyo badan, kuwo waaqici ah iyo kuwo mala awaal ah.

Waxay arrini ku soo uruudhay, talooyin badan ka dib in sheekooyinkaa iyo mowduucyadaa qiimaha badan uu ka sameeyo buuggaag ay bulshadu marjac ugu noqoto una akhristaan.

Taladaas loo soojeediyay ayuu ku dhaqaaqay inankii, wuxuuna bilaabay in uu qoro buug cilmiyeed. Laakiin waxa ku adkaatay sidii uu uqori lahaa buug sababtoo ah ma uusan helin cid kala talisa arrintaa, sidoo kalena ma uusan helin cid waxaan uga horeysay.

Qofkii uu is dhaho utag oo u sheego arrintaa waa ku qoslaa, wuxuuna ku dhahaa waad riyoon, ma waxaad qori kartaa buug, dad adi kaa aqoon badan oo kaa maskax badan oo kaa waayo aragsan baa qori waayay adna waxaa leedahay waxbaan qoraya oo hadana waxaa leedahay halaygala taliyo waxaas macquul ma ahane waxkale sheeg.

Waxa uu la kulmaayay niyad jab balaaran qofkasta uu la kulmo. Qayb badan waxay isku dayayeen in ay ku jeesjeesaan, kuna qoslaan, waxayna hoos iskula faqayeen in ay mooralka laga dilo. Balse **nin qoyan biyo iskama dhowro** waxa uu bilaabay in uusan dheg jalaq usiin, howshiisana uu siiwato ilaa uu ka gaarayo hadafkiisa.

Waxa uu yeeshay cadaw badan, laakiin waxa uu garwaaqsaday in qofka ku kaca in uu gaaaro mid ka mid ah hadafkiisa ay la soo gudboonaanayso caqabado ay ka mid yihiin kuwa aan ka soo sheekaynay laakiin looga baahan yahay in uu dulqaad muujiyo kana guulaysto cadawgiisa.

Muddo waxa uu sidaa ku jiraba waxa u bilaabay qoridda buugga, nasiib wanaag waa ku guulaystay balse markii hore waa ku adkaatay in uu wado buugga maadaama uusan lahayn aqoon, waayo aragnimo iyo xirfad uu wax ku kala hago.

Dulqaad badan ka dib waa ku guulaystay buuggiisii ugu horeeyay uu qoro, waana ku farxay taas waxayna sii galisay hididiilo cusub. Balse waxa uu guda galay in uu tifatiro, howl badan ka dib waxa uu daabacay daabacaadii ugu horeysay buugiisii, laakiin waxa ka soowajahday dhib badan waayo aqoon uma lahayn qaabka wax loo daabaco iyo cabiradda ay kala leeyihiin buugaagta.

Waxaa kaga baxay kharash badan in uu daabaco buugaas ugu yaraan 8 jeer ayuu ku baxshay lacag badan si uu u helo nashqadii ugu wacnayd. Dhib iyo rafaad badan ka dib waa ku guulaystay buugaas. Wuxuuna bilaabay **buuggii labaad**, waxaana u fududaatay in uu qoro buugaas waayo marakan waxa uu cashar ka bartay buuggii hore, waxa uu iska dhowray in uu ku dhaco godki uu horay ugu dhacay.

Nasiib wanaaag muddo laba bilood ah ayuu ku guulaystay in uu ku dhameeyo buuggii labaad. Sidoo kalena waxa uu bilaabay **buuggii saddexaad** waana ku guulaystay si ka howl yar kuwii ka horeeyay. Howl kasta marka lagu dhaqaaqayo waxay leedahay dhib iyo rafaad. Waatii la yiri inkastoo la raagsado lagu sugo rafaad badan rajadii la dhowraa mar uun bey rumowdaa

Waxa dhacday habeenada qaar in uusan seexan jirin waaguna ugu baryi jiray, marmarna uu ku dul gam'i jiray maankaabkiisa (Kumbiyuutirkiisa), isagoo is ogayn ayuu kici jiray aroortii. Haddana marna kuma dhalin in uu is dhiibo isagoo waxaas oo rafaad ah soomaray.

Waxa uu ka midnoqday wiilkaas da'da yar qorayaasha soomaaliyeed, wuxuuna ahaa mid ku caan baxay arrimaha bulshada ka hadalkooda iyo waxka qoriddooda. Dad badana uu ku kasbaday wanaagiisa iyo dulaaadka uu leeyahay. Qof walbaana haddii uu go'aansado in uu wax ku dhaqaaqo waa gaarayaa, Allihiisna tala saarta waana hubaal taas.

Haddaba ninkaa aan ka soo sheekaynay miyaad taqaaniin waa qoraaga buuggan aad akhrinayso.

2, Qoraa Maxamuud Axmed Muuse (Toolmaan), Aabihiisna waxaa lagu naynaasaa Dhagawayne Muuse Gaban. Taariikhdiisa ma ahan mid halkaan lagu sookoobi karo. Laakiin sida dhabta ah qoraagu waxa uu sooqaatay taariikh kooban oo ku saabsan dadaalkii uu ugu jiray halgankii noloshiisa.

HAL ABUURKA MA LOO DHASHAA?

Inta badan waxa la aaminsanyahay in qof walbaa hal abuur leeyahay. Hal abuurkana waxa uu ku yimaada qofka hankiisa iyo sida uu wax u saadaaliyo.

Waxaana xaqiiq ah ruuxkastana in uu yahay sida uu isagu iska dhigo. Haddii aad dhahdo waxaan rabaa in aan sameeyo hal abuur, waxaana doonayaa in aan la imaado qorshe cusub oo aan naftayda iyo dadkayga anfacaya.

Tusaale, waxaad go'aan satay in aad ceel ka qodo meel aan biyo lahayn, imisa qof ayaa ka faa'idaysa ceelkaa? Adise maxay faa'ido kuu leeyihiin?

Dad badan waxa ay ku doodaan abwaanku ma caama? Waxaa laga baxshay aragtiyo kala duwan laakiin ani waxaan aaminsanahay in uusan ahayn caamo waayo waxa uu saaddaaliyaa wax aan hadda jirrin ama imaan doona. Wax dhacay oo uusan joogin, wax uusan aqoon oo uu sifeeyo, dhammaantood waxaa ka helaysaa suugaanteena cajiibka ah.

Qofka ma samayn karaa in uu wax curiyo? Haa waa samayn karaa sababtoo ah qofna kuma dhalan waa kula mid.

Cilmigu waa bad
Bulshadu ku baraaraan
Baal walba uraacaan
Bidhaan wacan yeesha

Ruuxii u bakhoola
In uu tacliin barto
Iyo kii u an babaxa
In uu baal dahab ah ka galo
Dunidaan balaadhan
Dadku bogcado ka yeesheen
Iyo kii samada baarkeeda
In uu ku yeesho bar
Iyo kii barbaarta dhigiisa
Bar bar ka raaca
Iyo qofkii ku baaqa
In uu u adeego bulshada
U bandhiga ummaddiisa
Barwaaqo u horseeda

Markale uu ka hadlaayay bulshada in iyagu yihiin kuwo awoodooda meel marin kara ayna dhisi karaan dawlad.
Wuxuu yiri qoraha buuggan:
Dhalinay isku duubnibaa
Dawlad lagu dhistaayo
Dayaxa lagu gaaraa
Waxaa diyaarado
Dusheena heehaaabaya
Waxaa dooonyo badeena
Dusheeda ku dikeynaya
Waxaa dabaabado
Dunidaa maasheeyay
Waxaa doolar iyo diinaar

Dadku ay wataan
Dayax gacmeedadaan la wada diray
Dawladuhu ku tartamayaan
Dayaxa dushiisa
Daar dheer ka taagaan
Annaguna dagaaliyo
Dib u dhac ku jirnoo
Nalaku tilmaamo dunida saddexaad
Dayaca iyo rafaadkuna
Isku duubnibaa looga baxaa

Waxaan ka fahmayna in waxkasta looga baxo wada jir, sidoo kalena lala yimaado wax bulshada anfacaya.
Soomaalidu waxay dhahdaa ruuxii tiin iyo timir talaalow taariikhdu way qorin.
Ma doonaysaa in aad noqoto ruux tusaale noqda waxa wanaagsanna lagaga daydo la imow hal abuur cusub si dadka ugu noqoto tusaale.

Mar kale waa tuu lahaa qoraha buugga geeraarkaan yar
Gun ma ahi dhabcaal la sheegiyo
Geyiga soomaali
Garaadkay imasiin
Gayi kale in aan ubakhoolo
Gumaysi raadsado
Gaal Alle garanaynin
Garka intaa ku dhego
Gogosha u xaarto
Gacmaha utaagto

Gani isii iraahdo
Il gurucan igu eego
Gaar ii ilaalaysto
Argagaxiso igu guhaado
Dhii gayga ku banaysto
Gar shaydaan ila aado
Xasbi laygu gooho
Cimri gay ku qaato
Go' ayay iraahdo
Gaygii iisoo gurmada
Intii garba duuduub looqabto
Farta lagu godaayo
Isna gayiga laga taxaaba

Waxa uu kaga hadlaayay qofka in uusan isdhiibin dhibkasta loogaysto in uu layimaado dulqaad iyo xilkasnimo. Waxa uu muujinaya in ruuxa laga dareemo daacad nimo lagu tilmaamayo qof danbiile ah. Sidoo kalena in qofku aamino dalkiisa kana tahriibin. Waayo haddaad ka tagto dalkaaga yaa uga tagaysaa?

Isku soowada xoori qof walba in uu yeesho hal abuur ummaddana ku sookordhiyo afkaar cusub iyo wax lagaaga daydo. In cilmigiisa la’ aadin dal shisheeye, dhulkiisana ubaahan yahay in uu aamino kana shaqaysto fikir iyo hal abuur cusubna la yimaado. Sida aad uhanato guushaada iyo hal abuurnimadaada, waa in lagaa helaa qodobadaan.

1. Ula dhaqan qofkasta sida aad adi Jeceshahay in laguula dhaqmo.

2. Lana jeclow walaalkaa waxa aad adi naftaada lajeceshahay.

3. Uhibee bulshada kalgacal, haddii lagu neceb yahay ha isku arag nacas iyo ruux aan la jeclayn. Laakiin waa sida aad iska dhigto adi.

4. Noqo qof ra'yigiisa ka dhaadhicin kara dadka si xarago iyo xushmad leh.

5. Hanoqon ruux sida uu doono usocda, haddii kale waxaad galaysaa god aadan ka soobixi karin.

6. La imow qorshe cusub, kaasoo aan liddi ku ahayn jiritaankaaga iyo kan bulshada.

GABAY KA HADLAAYA GUUSHA

Guusha ninkii gooba waa ka gun gaaraaye
Guri jiif iyo laguma helo gashiin la cunaaye
Guri weyn iyo laguma helo gogol raaxaade
Gani iyo laguma gaaro gows nin leeyahaye
Gaf naftaada ka gashiyo laguma helo canaan joogtaaye
Goofaaltan iyo ma ahan xaajo gaaraaye
Gacaltooyo laguma helo gaanka aad tahaye
Gaari laguma gaariyo faras foolaada
Guyaal baa loo safraa luulka aad goobi
Gar waaqsashada khalad kaad gashaa waa libin weyne
Waa guul cajaa'iba hadafkaaga oo aad gaartaaye
Guulihi kuu gaarsiiyaa loogu mahadiyaaye
Xaajo is gunuday oo gaar uga faalootay
Iyo go'aan aad gaari wayday waa lootalo balaarsadaaye
Markaad gunta heshaa faas lagu gooyaaye
Geedkii harwayba goonidiisaa loo ilaashadaaye
Waa guul cajaa'iba hadaad garato yoolkaaga.

---

1. Gabaygaan waxaa tiriyay Qoraaga buuggaan, wuxuuna kaga hadlaayay in guusha si fudud lagu helin, loona baahan yahay dulqaad iyo samir dheeraada.

GUNAANAD SOCDAALKA NOLOSHA

Sida aan ka soo sheekaynay guusha laguma helo dheel dheel iyo raqiis, dhib baa loo maraa waa loo dhididaa, dhereg iyo dhalanteedna kuma gaarsiiso. Waa inaad ka dhiidhidaa waxkasta oo keeni kara dib u dhac, hammigaaga oo hoos mara, horay socodkaaga oo noqda mid aan wanaagsanayn, hididiilahaaga oo yar, hadaf la'aanta dhammaantood waxay kugu hagaan guul daro.

Hamigaaga iyo jeebkaaga layskuma jaan gooyo, waxa keliya oo aad haysataa waa waxa kugu qaalisan nafsadaada waana maskaxda dabiiciga ah oo Alle kugu manaystay. Haddii aad koobto oo aad tiraahdo ani meel ma gaari karo, xayn daabka ma dhaafi karo, dhibaataa ihaysata, duruuf baa jirta, waan xanuun sanaya, waxbaa iga siya haka yaabin in ay kugu hagaan waddada guusha balse adaaba naftaada u horseeday guul daradii ugu weyneyd.

Haka dhaadhicin maankaaga wax aan ku toolmoonayn iyo wax aysan u qalmin. Waa muhiim in laga taxadaro ka weecashada waddada aad hayaanka u tahay.

Guuldaradu waa in aadan darsi ka baran duruuftii kuu keentay dib u dhaca iyo in aad dadaalkii aad muujisay gacanta ku dhigiwaydo. Guuldaraduna waa furaha guusha, waana aasaaska yoolkaaga iyo ka miro dhalintiisa.

Raaxo laguma helo guusha iyo raqiistoona
Rafaad baa loo maraa rugta aad goobi
Reerka laguma furo meel baad iyo rays toona lahayne
Runta waxay ku dhaxal siisaa halka aad u roori
Ruuxna rajo la'aan kuma helo goolka uu dhaline

Sida ku cad tixdaan, rafaad, jab, walaac, qoomamo, niyad jab, gocasho, isbedel la'aan, raaxo, isku day la'aan, go'aankaaga oo jilicsan, hamigaaga oo yar, garaadkaaga oo aadan ka shaqayn, dhammaantood laguma helo guusha iyo yoolka aad leedahay.

Waa in aad ahaata ruux mar walba la jaanqaadi kara wacyiga markaa jira, waxay kaa saacidaysaa inaad ku jabto yacni ku dhacdo jidka aad dooni.

Guushuna waxay leedahay jaran jarooyin loomaro sida dabaqa loogu sameeyo salaanka ayay ubaahan tahay guushuna in aad u samaysato hadaf si aad u gaadho yoolkaaga.

Waa in aad ahaataa guul ujoog laakiin ha ahaan guul dare ujoog, waxna ka baro guul darada. Maalintaad cashar ka baran waydo guul darada ayaa ku fashilantay nolosha.

Ugu dambaynti ha is oran mahaysto lacag, garab, gaashaan, waqti, qof isaacida, ma awoodo waxaa IWM. La imow qorshe cusub kaasoo kugu hagaya bartilmaameedkaagi, ogowna guushu waa soodhutida guul daraduna waa soo deg degtaa.

Muuji samir, dulqaad, xilkasnimo, daacadnimo, run ka sheegid waxa aad dooni, Rabbi ka cabsi, xaasidnimada oo aad ka dheeraato, inkirida dadka ku niyad jabinaya, ogolaanshaha wixii guul kuu horseedi kara dhammaantood waa furaha guusha. libinta nin holiyaa hela.

—

3. Wixii khaladaad ah oo aad ku aragto buuggaan iyo wixii talo ah oo aad hayso ku soodir emailkaan iyo nambarada hoos ku qoran.

1. E-mail; Mahamudp2@gmail.com
2. Page-kayga facebook: Qoraa Maxamuud Axmed Toolmaan
3. Tell: Golis 0025290-7-635771 ama Somtel 0661712512 ama 0612482681 ama 0682030759

Mahadsanidin akhristayaasha sharafta leh

Tixraaca

1. **Qur’aanka Kariimka Ah**
2. **Axaadiista Suubanaheena Ka Sugnaaday**
3. **www.oocities.org**